# BOOG JACAYL MA BOGSATO

QAYBTII 2aad




Qore: C.A. SIRAAD "SEES"

Dookhu baaxad weeynaa
Kalgacaylku ba'anaa
Beryo midaad jecelaatoo
Bugto kugu abuurtoo
Bidhaanteeda weeydana
Bisinkee dhib badanaa!
Xususteeni barigii
Baakaadageenii
Inxu badh iga guuroo
Baryo iga soodaaloo
Bimad igaga tagayoo
Baa'baan u haystee
Ileen baaq kalgacaloow
Bimadkaagu muudamo
Ilcen boog jacayleey
Ma bogsootid abidkaa!.

** SEES **

## M A H A D N A Q

Waxaa mahad aan la soo koobi karin iga Mudan Saaxiibkay Maxamed Xasan oo waqti igu huray soo saarida buuggan;bahaana Shaqsigii igu taageerey qoraalka mar kastana dhiiri galin ila diyaar ahaa.

= Waxaana mara iloobi karin Saaxiibkay Baaderi oo mar kastaba iga kalmeenayey Dhanka masawirada buugaagta aan qoro.

= Waxaan Mahad Balaadhan u celin hayaa Xuseen Sheekh Bixi oo si saaxiibtinimo iga gargaarey Qoraalka buugga.

** SEES **

## F I L A SH O W A C A N

Waxaa dadweynaha akhriska jecel lala Sooodsiin hayaa in ay dhawaan soo bixi Doonaan buuggaagtan cusub.

=TUSAALE ADUUN ...QOR XUSEEN SH.BIXI

=ADUUN KALA WAR LA" Ca.A.Siraad SEES"

= Ma DUUGOOBO CALAFKAA LAASTASINAAY

=ERRGA AAKHAROi iyo kuwo kale oo idin xiisa galiya.

= DHAMMEE DHIIGGA JACAYLKA!waa buug dhawaan soo bixi doona,waana qiso idin raali galin doonta.

=Nabsi maal ma daweeyo Duur-gal

** SEES **

Buuggan yarka ah Waxaan
Xusuus gaar ah uga dhigay
Dhammaanba intii ayagoo
isjecel,haddana waayaha
Aduunku kala qaadey....
Walina sidii ku kala maqan.

Qaybtii 2aad ee sheekadii

BOOG JACAYL MA BOGSOOTO .

Muqdisho= 92 9/88

Xuquuqda buuga waxay u dhawran tahay Qorha,idan la'aantina wax lagama qaadan karo.

"Qac"ayaa kayeertay qalbigayga naxdin darteed,anoo caro lahadli la'ayaan kaqaaday warqadii,si aan u akhristana gudaha u lagalay.si deg deg ah ayaan u furay una bilaabay akhrinteedii,waxaa iigu qoraa erayädan...

Iga gudoon salaantii kalgacal ee qiimaha gaarka ah lahayd,salaan kadib waxaan filayaa inaan boog ku yeeshay laabta,waayo markaan wax xasuusto ayay meeli iga danqataa,wax ku dhacayna war uma hayo waxaan u malayn...

Daymadeenii barashada
Daqiiqadeenii sheekada
Kaftankii ducaysnaa
Hadaladii dahaarnaa
Dulucdeenii sheekada
Damac iyo xishoodkii
Ayaa ila dugaaloo
Daris aanu noqonoo
Dabka qaata maankoo
Boogtii doogu yeeshee
Uu kaqaaday diirkay
Kolba iga danqaanoo
Dareen igu kaeshaanoo
Daawana u waayoo
Naftu raaxo diidoo
Duli baan ku noolee
Maxaa lagu daweeyaa

Naf kal gacal diloodoo
Damiirkii kaqqadoo
Aan dareemin noloshaba?

Markii aan dhameeyay,ayaan hadana ku noqday erayo dhadhan leh oo rajo nololeed igu beeray ayay ii noqdeen,muddo markaan kalmadahaa yaabkooda iyo su'aalahaas culayskooda k kayaabanaa ayaan go'aansaday inaan isla galabtaas waraaq u qoro,si deg deg ah baan ula soo baxay qalin iyo buug,xaashi intaan kagoostay ayaan in muddo ah kafikirayay waxaan ku qori lahaa,kadibna ku bilaabay erayadan:-

Iga gudoon salaantii kalgacalka ee macnaha gaarka ah lahayd,kana soo go'day dhamaanba xubnaha jirkayga,waan helay warqadaadii..Maxisaabi karo,mana malayn kartid saan ugu farxay,qalbigana xxx ugu kaydsaday..;
laakiin waxaad ogaataa...?

Kalgacaylku waa dahab
Waana daawo iyo malab
Waana nolol dareen badan
Waa dookh xusuus kulul
Mara waa sun iyo dacar
Waana cudur dahsoonoo
Daawa loo heleynoo
Laga wada digtoon yahay
Waxse iga dardaaran ah
Oo daawa noqon kara
Labadii is doortaa



Daacad inay noqdaanoo
Kalgacayl daryeelaan

markaan dhameeyay ayaan horay ka bashqadeeya si deg deg ahna u soo baxay gurigii Layla ayaan imid,markaan is dhaafsanay salaantii farta ayaan kasaaray,kana codsaday in ay bari iiga keento waraaq,yaab badanaa ileen naf jacayl hayo madareento dhibatada mana daasho sidii ayaan kaga soo baxay si aan uga dhuunto mawjadaha kulul ee adduunka,ayaan shaneemo suber galay in yar markaan daawanaayay ayaan xasuustay in kuraastaan ku fadhiyo ay tahay kuwii aan muddo badan aniga oo faraxsan iyo Raxmo kuwada fadhiisan jirnay,naxdin culus,oo kharaar iyo xusuus kulul ayaa man qalbiga ku kulmay caku!nafta ayaan uurka ka idhi,markaasaan kor uga kacay kursigii aan ku fadhiyay,maxaan filim da wadaa aniga ayaaba filim aheayaan qalbiga ka idhi.

Markuu dhadhan ii yeelan waayay filimkii ayaan kasoo baxay anoo isku buuqsan, ayaan wadadii cagta saaray,maskaxdaydu waxay qaadi wayday mashaakilkii adduunka ee aniga iyo Raxmo nahaysta. Farxad iyo qosol waxaa iigu danbaysay maalintii anoo saldhigga joogga Raxmo laygaka soo tagay.

Qosol aan awood lahayn ayaan ilkaha kala qaaday markaan soo xasuustay cawadii saldhigga afar irdood ,qosolkii waxaa ii badalay

Xusuus kulul markaan soo xasuustoerayadii ay ku dhawaaqaysay Raxmo,"Haddii aad Cabdi xirtaan waa in aad ila xirtaan"waa erayada aan sina uga bixidoonin xusuustayda,waxaan rumaystay in nafta si dhab ah kuu jecel aad jeclaanayso.

Ayaamaha marba marka kadanbaysa ayay iigu sii daraayeen,naftu bohol yow madayso xalna mahesho. Talo waxaan ku goostay inaan waanadii sarkaalka raaco waxna ku qabsado.

Muddo ayaa laga soo wareegay inta aanan in dhaha saarin Raxmo,boholyowga iyo xiisahaaan u qabana ma hayn karo, Qalbi wax jecel maquusto,dantu waxay ibaday inaan nafta sasabo,si ay uga nabad gasho Xusuusta kharaar.

Talo waxay igu cadaatay,oo cirku dhan igaga soo dumay;rajadayduna shaki gashay wax ay ahayd markay iisheegtay Layla in Raxmo ladoonaayay in nin kale la siiyo,qaracan badanaa oo qaraaraa markii adaan awood lahayn kalgacal kula darso kadibna jacaylkaagu tartan galo,uguna dhawaato in lagaaga badiyo dabadeedna jug wayni ku gaadho.Hadalkaas ayaana iigu darnaa intaan wax maqlo."Raxmo ninkale ayaa lasiin madhici karto! maxayna u dhici karin caawa hadii lagu siiyo awood aad ku guri gashaba malihide,mise aqalka foornada



inay kugula noolaato ayaad doonaysaa?"ayay naftu isweydiisay.Naxdin ayaa lasoo boday markaan xaqiiqda noloshayda ka arkay Yaab badanaa naf iyadu isasiraysa oo xaqiiqdii ka dhunmanaysa,iyo dookh aan dantaada latashanayn ee meeshuu doono u gar qaadaya.

Shakigaas wuxuu kharaar ka dhigay nolo shayda oo markii horeba mugdi ku jirtay miciina waxaan kadhigtay isu qorkaa waraaqaha.

Sidii caadada u ahayd ayay galab iigu soo gashay foornadii ayadoo aad u ged degsan ,si dareen leh ayay isugu kay duubtay, iyadoo leh.

"Aboowe Cabdi...Aboowe Cabdi way ii - dhamaatay ".Ilmo badan oo dhabanadeeda ka soo daadatay,naxdin iyo xusuus ayay lahadili wayday. Naxdin darteed ayaa qalbigu ila gariiray,markaasaan hadli kari waayay mardanbe ayaan ku iri.

"Raxmo maxaa kugu dhacay?"

"Aabo ayaa nin i siiyay"

"Goorma?"

"Ma aqaano goor uu isiiyay iyo ninka toona ,laakiin jiddah ayuu jiraa wuuna imana-

yaa bishan dhexdeeda ayaa laygu yiri,markaas waa inaad aabahay dad u soo kaxaysato oo aad u tagto haduu ku diidana waynu katashanaynaa,laakiin aboowe siy aad yeeshaba waa inaad aabe u tagtid oo aad kala hadashid arinkaas".

Yaabkaa dartii ayuu iiga sii bixi waayay hadalkaan oran lahaa,anigoo lay moodo qof suuxdin kasoo miyirsaday ayaan ku iri.

"Waa yahay"si dareen leh ayay iigu dhegtay,iina dhunkatay waxayna igu tiri.

"Si aan la iitabin waa inaan si deg deg ah u laabto ee ina keen",laba dacas oo kala jaad ah anigoo qaba ayaan horay kasoo raacay ilaa xaafadda Hamar weyne waxaan siifalan qaynaynay sidaa jacaylkanaga u meel marin karo,markaan xaafadii geeyay ayaan kasoo laabtay.

Anigoo laba dacas oo kala jaad ah sidii dadkii waalaa qaba ayaan xaafadii imid. Badwaynta aduunka ayaa iga dhex gashay nolosha,dhibaatadii jacaykuna way ii garabgashay,dan yaraana way ku sii biirtay,markaan meel aan wax uga hagaago garan waayay. Shida badanaa caashaqu markuu faqiirnimada kugu helo, markaan arkay dhibaatada taala ee iga awood wayn,si aan wax uga qabtana aanan garanayn ayaan aad uga xumaaday, waxaana qalbigayga ku soo dhacday:



heestii,"Kufay maalintaan kaalmo aan waayee kaligeed fari markay tahay maxay kabaysaa"wanaag iyo iqarso ayay ahaayeen wixii hore hadaase yaab iyo rafaadka joogaa,waayo?Raxmo la iloobo waa calaacal timo ka bexeen danta ihaysana mid laxisaabi karo ma ahan...Waana qasab inaan Raxmo helaa.In muddo ah markaan naftayda kala doodaayay hawlahaas in wax laga qabto u baahan,ayaan saaxiibkay Cali u soo bandhigay intaan u imidna ku iri.

"Caliyow waxaan galay shil aad u xun oo hadaadan wax igala qaban sina aanan uga badbaadi karin,taas oo ah :Raxmo waxaa lasiiyay nin Jidda ka imaan doona mardhaw,haduu yimaadaha horaa looga darayaa markaas waxaan isla garnay inaan aabaheed u tago oo aan rag kaxaysto..hadana waxaan kaa codsanayaa inaad arinkaa waano iyo garaba aad igu siiso",runtii aad ayuu uga xumaaday markuu maqlay in Raxmo nin lasiiyay,waayo ?wuxuu ogaa in ay tahay cad kamid ah jirkayga,intuu madaxa lulay ayuu si naxiisleh iigu yiri.

"Cabdi horta aad ayaan uga xumahay arinkaas inkastoo aan ogahay in ninka ragga ah wax kasii daranba uu soo,maro,hadana waxaan ku dhihi lahaa isaga dul qaado koley calafkaa ma waayayside,dhanka wax tarkana anigu waxaan heli karo oo dhan diyaar baan kuula ahay,dadka aad kaxaysanaysana waan

raacayaa...shilimadiina waan ku siin hayaa"farxad aan in muddo ah moogaa ayaa isoo gashay,xadhig kamid ah kuwii i dhibay ayaa iga furmar,inkastoo aan wali far ka qodnayn xalinta dhibaatadayda.Aadbaan u dareemay inuu Cali yahay qof bini-aadam - ah oo wanaagsan tixgaliyana baaxiibtinimada.

Galabtii danbe dantu waxay igu qasabtay inaan faarax miciin karaadsado oo aan kamid dhigo ragga aan raacayo sidii baana ugu tagay gurigiisa,markaan galay qolkii fadhiga oo isaga iyo xasan ayawada fadhiyeen salaan aan buuxin intaan salaamay ayaan fariistay. Muddo yar hadaan fadhiyay oo aan is waraysanay ayaa dantaan u imid u soo bandhigay kuna iri.

"Faaraxow maanta dhibaato ayaa ihaysata.Sidaas daraadeed inaad wax igala qabataan doonayaa".

"Maxay tahay dhibaatadaasu".

"Waxaa i haysta dhibaato mustaqbal oo gabar aan doonaayay...Markaas waxaan kaa rabaa inaad bari galabtii ii raacdo oo aabaheed iila tagto",ayaan si dareen leh ugu sheegay. Maxuma in dhibaatada lasla kaalmeeyo,laakiin waxaasu dhibaato maahan waxaanse ku dhihi lahaa adigaa lafahaagaba wax u qaban la'oo nolol xun ku jira hadana guur iyo badiis iska daa".



" Naftaan ogolayne wax may la qabanaysaa?"ayaan si kulul kula soo booday .

" Wax yahay bari galabtii halkan iigu imow wixii karaankay ah waan kuu qaban waana ku raacine",ayuu hadalkii kusoo xiray isagoo iga yaaban.

Si aan la qiyaasin ayaan ugu farxay, waxaana ku sigtay farxad dardeed inaan isku duubo. Deeq ilaah baa badan dabkii iyo shidadii ihayday waan iska fur furay, anigoo faraxsan ayaan is gooydka kaasa bobolaare caasi kasoo raacay ugana dagay shaqaalaha halkaas oo aan uga soo lugeeyay gurigaygii.

Farxadaan ku dhex jiray waxaan kasoo baraarugay markay naftu i waydiisay " maxaaji Cumar ayaad u malaynaysaa inuu ku orandoono Raxmo waan ku siiyay,dan yaraan taada kasakow ayuuba sidiida kuu necebyahaye",jawaabtaa ayaan kanaxay. Naftu qaad qaad badanaa dabay gacanta lagashay,iyadana waa garteed waxa u daran ayay inay xaliso rabtaa,haday xalin waydana halis ayay ku jirtaa. Mar qur ah ayaan ka dhex baxay xadkii farxadda ogaadayna inay wali dhibaato badan idugayso in aan xaliyo.
" waa in aan laboxo hadii la ii diido, soo meheriyo dib aanan u soo celine guri gaysto,alaabana dhigto arad iyo anfaacina waa lagaa rabaa,iskoolkiina afar bilood

ayaa kaaga dhiman markaas seed wax yeeki?" ayay naftu ku doodey,"ilaahii nafta abuuray ayaa og si ay noqondoonto iyo waxay ~~XX~~ qaaxdaante mudan doonto",intaasi ayaan markaan isugu jawaabay derbi fariistay si a aan xal iyo go'aan ugu raadiyo mashaakiladka nafta hortaagan.

shaqadii ayaan horay kahilaabay markaan tagay,intaan dhameeyay ayaan go'aansaday inaan warqad u qoro oo aan lasoo baxay warqad iyo qalin waxaana uga bilaabay hadal.

"Iga gudoon salaan kalgacalka... meel meel ayaan uga qoray eradadan".

Hawlaha adduunkaa
Halbowlaha igooyoo
Naftan haadka raacdaan
Haasaawiyaayoo
Heesaha u qaadaa
Hayaankii jacaylkaa
Heensaha isaaroo
Habqan iyo rafaad baa
Hareerayhayga joogoo
Tikaa hibeeyoo
Hurdo waan ka dhaartee
Halis baan ku suganoo
Harsan waayay aniguye
Go'do adigu ma hurudaa?.

Markaan dhameeyay ayaan horay ka aaday gurigii Layla,meelaan soo maray anoon war



ka haynin ayaan tagay markaan garaacay gurigiina waa latga furay markaasaan waydiiyay "Layla ma joogtaa?"anigoo faraxsan ayaan horay u galay markii la iisheegay inay joogto.

Hadalkayga intay maqashay ayay ka soo bamaday qokkeedii oo igu soo dhawaysay qolkii fadhiga ,dheeko dareen leh ayay sidii caadada u ahayd ii bilowday markay dhamaysay intaan hadalka kaqabsaday ayaan ku iri.

"Raxmo warqadaan u gee una sheeg inaan bari galabtii sidaan ku heshiinay odayaal la imaan doono", aad iyadoo u faraxsan yaabna ka muuqdo ayay igu tiri,"

"Laakiin ma u malaynaysaa in aabaheed arintaan idinka yeelaayo,xaalkiisuna wuxuu ku danbayn inaad tashataan".

Markaan dhamaysanay sheekadii ayaan soo kala taganay waayada adduunka ayaan d dhinacyada iga muuseeya ka fiiriyay,naxdin badanaa oo farxad daranaa,oo walaac badanaa marka ay dan yaraan iyo dookh nafta wadaagaan,ee ay jah wareerto deedno ay garaawaydo meel ay ku socoto kadibna ay dhiiqato waayaha adduunka ayaa saacadba meel igeeya kolbana nooc iigu yimaada mar qabow mar kulayl kolba si ayuu isugu kay badalaa. webigii iqaadyoo kaan weheshanayaa maxaa kuugu wacanoo wadkii iigu noqotay"ayuu xaalkaygu

matayaa. waxba wax kadarane markaan soo xa-
sursto kulankaan xaaji Cumar lakulmidoono,
iyo waxaan ku qiyaasayo inuu dhihi doono
ayaan kasii naxaa. wal wal wayn ayaa igu a
abuurmay in Raxmo iska kay badasho, markuu
aabaheed iidiido aan kabaqay ama in minkii
yimaado,ileen adduun isku halayn malahee.

Wax lasugaba waxaa soo gashay maalintii
aan kaseexan waayay,aniga ,Cali,Faarax iyo
Sahal oo isla socona wadanana baabuurkii F
Faarax ayaanu ayaanu tagnay gurigii xaaji
Cumar,dibada intaan dhiganay baabuurkiin
ayaan waydiinay inuu joogo. Markii nalaga
furayna waxaa naloo cadeeyay inuu joogo.
isla markaana qolkii fadhiga ayaa nala gee-
yay. Raxmo oo na arkaysay baa noo soo gash-
ay,hadana intay na salaantay ayay si deg d
deg ah oo cabsiyi ku jirto nooga baxday.

Xanaaq iyo caro ayuu wajigiisu badalm-
ay markuu indha iga qaaday,salaan aan niyad
ahayn ayuu nasakaamay isagoo isii fiirinaya

Mudo yar markaanu shekaysanay ayuu
Faarax dantaanu u nimid u bilaabay oo ku
yiri.

" Xaaji Cumaroow waxaan u nimid ...
markaas waxaan kaa doonaynaa wahaag iyo
gacmo furan ". si wanaagsan ayuu guud ahaan-
ba uga dhaadhiciyay arintaan u nimid.
Xaaji Cumar isagoo kayaaban kana naxsan arrin-



ta kadiska ah ayuu ugu jawaabey,hadalkaagu
ma xuma,laakiin Gabadhu nin bey ledahay
haddeyna lahayn xataa wiilkan mara ma siiyen
wax iga ceshada ayaan la aa,marka hatan ah iga
ceshada.Naxddin igu soo korodhey darteed ayaan
maqli waayay hadaaladii danbe ee lays dhafsan
hayay.Markuu diiday inuu noo liico ayay dantu
nugu qasabtey in aan isaga soo baxno,anaaba da
alac lay raacdey oo laygu yiri...

"Gabar nin leh maxaad noogu soo kaxaysay?!"aya
goo moodaaya in hadalka xaaji cumar uu run yahay
anoo aad uga yaaban mugdiga igu soo socda iyo dhibka
ka nololeed ee u baahan in aan wax qabto,waxna ka
qaban karin oo isku buuqsan ayaan soo raacay
waa kharaar nolosheeyda oo dhan xusuus kastana
sida dhinbil dab ah ayay qalbiga iiga dhagtaa
waxaan cunaba waxay ii noqdeen qaraar markasaan ka t
tagaa.Qosol markaan maagaba waxaa i hor imaan dhibaa
dhibaato jirta,markasaan danqadaa,hadal ma daayo
qalbigeeygu,daawana uma helo,doodina kama dham
aato.Galabkaas kharaarka leh wixii ka danbeeyay
waxaan u diyaar garoobey in aan badu buurta ha
dhaaftee la boxo Raxmo.Harhaar iyo kaalmo waxaa
ii noqotey shilimo aan ka qadey Cali iyo Farax
Ma seexan mana nasan ilaa aan diyaar u noqdo
in aan kaxaysto.

ma ii ogolayn noloshaydu inay ku xisaabtanto dhaqaalahayga waxaa uga daraa Raxmo oo ay waydo,markaan diyaar garawgii dhamaystay diyaara u noqday inaan ku dhaqaaqo labixitaan ayaan waraaq ugu qoray si aan ugu sheego inaan diyaar ahay. Ayaduna si deg deg ah ayay iiga soo jawaabtay galabtay imaan lahayd.... walina mahayo ma imanaysaa,armay imaan waydaa oo loo diidaa inay soo baxdo,shakigaas ayaan dhex galay.

G labtii ay ii qabatay in kastoo ay ka dib dhacday saacadii,mar danbe ayay ii soo gashay iyadoo qabtao dhar aad u bilicsan,wax nagu dhacayba galabtaas sidii caadada noo ahayd isku maanaan soo boodin fikirnnaxdin iyo farxadd darteed ayaan la hilmaanay. Anagoon is waraysanin ayaan horay ka dhaqaaqnay.

Muddo kadibna waxaan bas kasii raacnay siinaay ubaxaya Jawhar. Waa markii iigu horaysay intaan kabaxtay Raxmo ee aanu anagoo aamusan wada socono shakiga nafta ku jira ayaa u sabab ahaa?

Magaalada Jawhar markaan tagnay ee aan kadagnay baskii waxaan casho u raadsanay baar aan qarsoodi ahaan u dooranay, sidii ayadoo la wada daawanayo ayay aad u xishoonaysay in ay cashayso,waa gabbeede waligeed nin lama cashaynin mana lala bixin caawase jacaylkeedaa mawjad kagadisan



awigii ay ku noolaan jirtay dhexkeenay,markaasay aab dartii la aamustay

Waa u saacado uu laayahay jacayl a dhbta ah inuuna ku xisaabtamin nolosha iyo haqaalaha sidaa darteed nafteedu diyaar ay u ahayd inay ila noolaato iyadoo og antayda waxayna kadoo sooratay raakadii urigooda tan jacaylku u keenay.
oo yaab ma aha awooda jacaylku;hadaan laa been sheegin.

Marka aan ka soo baxnay baarkii ayaan halinyaro meel u dhax taagnayd u tagay on waydiiyay.

"Walaalayaalow iga raali ahaada waxadna ii sheegtaan meeshallaga helo qaadiga agaalada" iyagoo si naxariisle u dareemay odsigayga,ayay si wanaagasan iigu tilmaaeen,anigoo aan lahadlin ayaanu isasoo daa galay mudo yar kadibna waxaanu nimid olkii la iisoo tilmaamay,markaan garaacay waxaa naga furtay gabar yar markay faantay waxaan doonaynay ayay ii tilmaantay o igu tiri.

"Qolkaas ayuu ku jiraa".Sidii ayaan galay "Fariista...Fariista" ayuu nin da' ah nagu yiri. Laba ganbar oo halkii taalay ayaan ku fariisanay,intuu noo soo jeesaday ayuu igu yiri.

"Haye wiilkeey maxaa idiin darnaa?"
"Haa waxaan doonaayay...? dantaan u

nimid ayaan u sheegay su'aalo badan kadib na waa laygu meheriyay,wuxuuna balan noo qabtay barri sadexda saac oo aan kasoo doonano waraqadii meherka.

Anagoo shib ah ayaan kasoo baxnay habeenkaas ima soo marin mid iiga farxad badnaa;inkastoo ay jirto dhibaato nololeed hadana dan kama lahayn.waa gare naftaa wehelka ay adduunka ka doorato heshay.

Waxaan ku goostay inaan habeenkaa Huteel seexano,inkastoo ay Raxmo iga diiday oo iga codsatay inay lassexato gabar ay isyaqaaneen,anna aan huteelkayga iska seexdo sidii ayaanu ku heshiinay kuna balanay in barrito subixii aan ugu tago guriga ay seexanayso. Habeenkaasna in kastoo ayna iisuurto galin qorshahaan lahaa codsigeeda ayaan u meel mariyay.

Anagoo faraxsan ayaan ka soo baxanay degmada Jawhar oo aan wadadii xamar afka soo saaray,Raxmo oo yaab iyo farxadba ay kamuuqdaan ayaa gacanta i qabatay afka intay ii soo dhawaysay ayay i waydiisay su'aashay,"Cabdi aboowe xamar meel aan seexano xagee baan ka helaynaa?" "Kolee dantu waa lagama maarmaan.. qol yar oo aan hal sariir dhiganay,iyo alaabo lagu adeegto w waa jiraan;xataa dhixul iyo xoogaa raashi n ah oo aan maal maha hore ku dhaafno ayaa jira



ku dhaafno ayaa jira"ayaan si dareen leh ugu sheegay farxad intay la dhacday ayay gacantaydii ay haysay xoog u qabatay intay isoo fiirisay sidii laba qof oo hada is baranaya ayay igu tiri.

"Cabdi adiga caqli kaama maqna... danwooyee khaladka nolosha aad ayaand isaga ilaalisaa".

"Jacayl wax ma ilaawo" ayaan ugu jawaabay,markii noogu horaysay ayaan si farxad leh uwada qoslnay.

Qol yar oo cariish ah dantaydana aan ku miisaamay ayaan todoba barri ka hor xaafadda waaberi ka ijaartay inkastoo aan jeclaa in guri lagu noolaado,iyo aroo lagalo kii ugu fiicnaa aan Raxmo geeyo,hadana dani kaa adage kaasaan dooranay,oo w waliba aanu ku faraxsanahay.Wanaagsanaa jacaylku markuu ka xoroobo shuruudaha.

Xarar waxaanu soo gamay lixda saac ee duhurnimo,ceelgaab markii aanu ku nimid baskii aan siinaay kasoo raacnay ayaan hadana mid kale hambar afar u raacnay, marka aan marayno shineemo soomaaliya hoetaada ayaan ka degnay una lugaynay gurigii,intaan furay ayaa si kalosooni leh ugu fariistay sariirta kuna iri.

"Raxmo qado ayaan noosoo qabanayaa ee isii sug." si ged deg ah ayaan u soo baxay baar noo dhawaa ayaan ka sii qabtay

Qado anoo deg degsan soo laabtaylka aan u qabo inaan rali garan mids aan soo koobi karo,mark qadaynay,oo aan mayranay;woxoog ayay aragtay in aan fikirayo w tiri.

"Cabdi aboow fikirka badan o gowna in wax kasta oo nagu ti aan diyaar u ahay inaan kaala q noloshadana aanaaba soo doorta sanba waa igala qiimo badan tah koo dhan markaa iga daa fikirkabatee".Isma ogayn mar aan ku bmaray oo aan dhunkaday .
aamuskaa ii roone waa ii caado Raxmo ay qalbiga danqaan.

Qado kadib ayaan go'aansaniibkay Cali aan lasoocodsiipp xa haduu heli karana aan waydiisto a gacantaydu marnayd;hawlo badgayeen. Intaan dharkii xirtay a baxay,Raxmo ayaa iyadoon ila hata iqabatay oo igu tiri.

"Aboowe fariiso sariirtii fariisiday oo hana igu tiri,

"sug sug "boorso ay wadata qaaday oo intay furtay kasoo bixg fara badan,hoostayda intay soo ay igu tiri?

"Waa labaatan kun toban ma



hor auaan dahab kay ah gadaY,maadaa dheereed igu ahaa,markaa maadaama a danteena ogaa meel baan is dhogay . Waxaad doonto ku damee,laakiin waxa kaa codsanayaa in barito aadcwadaad naysid si aan u ducaysano",waa aan abay fikradaha miduhatan kale ka da tahaynaxdin ayaan wax aan ku had o waayay,matkaasoo,n sal mugii u fari oo aan si buuxda u fiiriyay sidii a ay maanya iigu horaysay.markaan wax ku jawaabo garan waayay ayaan anigo baxaaya ku idhi.

"Waa yahay;anoo fararsan oo dh nba naxdiyii aan qabay addunka kaba ayaan saaxiibkay Cali soo aaday",is awaa wax helka iyo wax la'aanta,far iyo naxdinyu,qosol a iyo oohintu"in ayaa maan kayga ku soo dhacaday,ma ku baxay foormadii yarta ahayd saax kay Cali ayaan u sheegay xaalkayga sidii ay arini iigu dhamaatay,muddo markaan lasheekaysanayay ayaan ku s baxay ?

Si aan barito ugu diyaar garoo ayaan habeenkii hore ugu seexday Su xiina hawlahaygii galay dhamaanba m an soo diyaarsaday,ayaan hadana wad dii u yeeray,halkaad oo ilaa gababt ay ku ducaynayeen,kadibna waxaan ay dhawr dhalin yaro ah oo ay kamid yeen Cali iyo Layla.

Iakstoo ay anga noo yahayd farxad aad u balaaran, laakiin dhalin yaradii timid waxuu u noqday arooskii ugu yaabka badnaa si farxadle shaki la'aan iyo gacmo furan a ayaan ku soo dgawaynay cariishkii kululaa ee aan sideed qof ka badan qaadi karin, waxaan u dagray sHeeko soo maali ah; ileen waa hiddo iyo dhaqan. Layla oo wadatay kaamero ayaa sawiro fara badan naga qaaday, qosol i iyo farxad ayaan habeenkaas ilaa afar saac ku wada joognay.

Mar danbe ayaan soo wada sagoontinay dhamaan dhalin yaradii ka soo qayb gashay xafladda xasuusta leh. Waxaan ogaaday in j jacaylka dhabta ahi uu yahay shayga ugu q qaalisan nolosha hoyga lagu dhisana uu yahay mid aad u adag, waxaan dareemay farxad a aanan soo koobi karin, fakarkii nolosha ee aan ku dhexjirnayna waan ka baxay, laga bilaabo maalintaas yaabka iyo farxdaba lahayd waxaan dhex galay nolol raaxo leh, waxaana ii macaanaaday dhammaanba dareenka nolosha ayaan macaan ii noqday. Runtii waxaan ogaaday in guurku yahay shay aad u qaali ah oo noloshu ayna sina uga maarmin.

Xaaji Cumar markuu ogaaday Raxmo inaan guursaday ayuu dacwo u guntaday, laakiin fikraduu rabay waxaa u diiday inay meel marto jacaylkii Raxmo.



" Naftaan ogolayne wax may la qabanaysaa?" ayaan si kulul kula soo booday .

" Waa yahay bari galabtii halkan iigu imow wixii karaankay ah waan kuu qaban waana ku raacine", ayuu hadalkii kusoo xiray isagoo iga yaaban.

Si aan la qiyaasin ayaan ugu farxay, waxaana ku sigtay farxad darteed inaan i isku duubo. Deeq ilaah baa badan dabkii iyo shidadii ihayday waan iska fur furay, anigoo faraxsan ayaan is gooydka kaasa b bobolaare caasi kasoo raacay ugana dagay shaqaalaha halkaas oo aan uga soo lugeeyay gurigaygii.

Farxadaan ku dhex jiray waxaan kasoo baraarugay markay naftu i waydiisay " maxaaji Cumar ayaad u malaynaysaa inuu ku orandoono Raxmo waan ku siiyay, dan yaraan taaga kasakow ayuuba sidiida kuu necebyahaye", jawaabtaa ayaan kanaxay. Naftu qaad qaad badanaa dabay gacanta lagashay, iyadana waa garteed waxa u daran ayay inay x xaliso rabtaa, haday xalin waydana halis ayay ku jirtaa. Mar qur ah ayaan ka dhex baxay xadkii farxadda ogaadayna inay wali dhibaato badan idugayso in aan xalito.

" waa in aan laboxo hadii la ii dibido, soo meheriyo dib aanan u soo celine guri gaysto, alaabana dhigto arad iyo anfaacina waa lagaa rabaa, iskoolkiina afar bilood

ayaa kaaga dhiman markaas seed wax yeeli?" ayay naftu ku dooday,"ilaahii nafta abuuray ayaa og si ay noqondoonto iyo waxay ~~noqondoonto~~ mudan doonto",intaasi ayaan markaan isugu jawaabay derbi fariistay si e aan xal iyo go'aan uga raadiyo mashaakiladka nafta hortaagan.

shaqadii ayaan horay kabilaabay markaan tagay,intaan dhameeyay ayaan go'aansaday inaan warqad u qoro oo aan lasoo baxay warqad iyo qalin waxaana uga bilaabay hadal.

"Iga gudoon salaan kalgacalka... meel meel ayaan uga qoray eraadadan".

Hawlaha adduunkaa
Halbowlaha igooyoo
Naftan haadka raacdaan
Haasaawiyaayoo
Heesaha u qaadaa
Hayaankii jacaylkaa
Heensaha isaaroo
Habqan iyo rafaad baa
Hareerayhayga joogoo
Ikaa hibeeyoo
Hurdo waan ka dhaartee
Halis baan ku suganoo
Harsan waayay aniguye
Go'do adigu ma hurudaa?.

Markaan dhameeyay ayaan horay ka aaday gurigii Layla,meelaan soo maray anoon war



ka haynin ayaan tagay markaan garaacay gurigiina waa latga furay markaasaan waydiiyay "Layla ma joogtaa?"anigoo faraxsan ayaan horay u galay markii la iisheegay inay joogto.

Hadalkayga intay maqashay ayay ka soo badaday qolkeedii oo igu soo dhawaysay qolkii fadhiga ,dheeko dareen leh ayay sidii caadada u ahayd ii bilowday markay dhamaysay intaan hadalka kaqabsaday ayaan ku iri.

"Raxmo warqadaan u gee una sheeg inaan bari galabtii sidaan ku heshiinay odayaal la imaan doono". aad iyadoo u faraxsan yaabna ka muuqdo ayay igu tiri,"

"Laakiin ma u malaynaysaa in aabaheed arintaan idinka yeelaayo,xaalkiisuna wuxuu ku danbayn inaad tashataan".

Markaan dhamaysanay sheekadii ayaan soo kala taganay waayada adduunka ayaan dhinacyada iga muuseeya ka fiiriyay.naxdin badanaa oo farxad daranaa,oo walaac badanaa marka ay dan yaraan iyo dookh nafta wadaagaan,ee ay jah wareerto deedno ay garanwaydo meel ay ku socoto kadibna ay dhiiqato waayaha adduunka ayaa saacadba meel igeeya kolbana nooc iigu yimaada mar qabow mar kulayl kolba si ayuu isugu kay badalaa. webigii iqaadyoo kaan weheshanayaa maxaa kuugu wacanoo wadkii iigu noqotay"ayuu xaalkaygu

matayaa. waxba wax kadarane markaan soo xasuusto kulankaan xaaji Cumar lakulmidoono, iyo waxaan ku qiyaasayo inuu dhihi doono ayaan kasii naxaa. wal wal wayn ayaa igu abuurmay in Raxmo iska kay badasho, markuu aabaheed iidiido ayaan kabaqay ama in minkii yimaado, ileen adduun isku halayn malahee.

Wax lasugaba waxaa soo gashay maalintii aan kaseexan waayay, aniga, Cali, Faarax iyo Sahal oo isla socona wadanaa baabuurkii Faarax ayaanu ayaanu tagnay gurigii xaaji Cumar, dibada intaan dhiganay baabuurkiin ayaan waydiinay inuu joogo. Markii nalaga furayna waxaa naloo cadeeyay inuu joogo. isla markaana qolkii fadhiga ayaa nala geeyay. Raxmo oo na arkaysay baa noo soo gashay, hadana intay na salaantay ayay si deg deg ah oo cabsiyi ku jirto nooga baxday.

Xanaaq iyo caro ayuu wajigiisu badalmay markuu indha iga qaaday, salaan aan niyad ahayn ayuu nasalaamay isagoo isii fiirinaya

Muddo yar markaanu sheekaysanay ayuu Faarax dantaanu u nimid u bilaabay oo ku yiri.

" Xaaji Cumaroow waxaan u nimid ... markaas waxaan kaa doonaynaa wahaag iyo gacmo furan ". si wanaagsan ayuu guud ahaanba uga dhaadhiciyay arintaan u nimid. Xaaji Cumar isagoo kaysaaban kana naxsan arrinta kadiska ah ayuu ugu jawaabey, hadalkaagu ma xuma, laakiin Gabadhu nin bey ledahay haddeyna lahayn xataa wiilkan mara ma siiyen wax iga ceshada ayaan la aa, marka hatan ah iga ceshada. Naxddin igu soo korodhey darteed ayaan maqli waayay hadaaladii danbe ee lays dhafsan hayay. Markuu diiday inuu noo liico ayay dantu nugu qasabtey in aan isaga soo baxno, anaaba da alac lay raacdey oo laygu yiri.

"Gabar nin leh maxaad noogu soo kaxaysay?!" aya goo moodaaya in hadalka xaaji cumar uu run yahay anoo aad uga yaaban mugdiga igu soo socda iyo dhibka ka nololeed ee u baahan in aan wax qabto, waxna ka qaban karin oo isku buuqsan ayaan soo raacay waa kharaar nolosheeyda oo dhan xusuus kastana sida dhinbil dab ah ayay qalbiga iiga dhagtaa waxaan cunaba waxay ii noqdeen qaraar markasaan ka tagaa. Qosol markaan maagaba waxaa i hor imaan dhibaato jirta, markasaan danqadaa, hadal ma daayo qalbigeeygu, daawana uma helo, doodina kama dhamaato. Galabkaas kharaarka leh wixii ka danbeeyay waxaan u diyaar garoobey in aan badu buurta ha dhaaftee la boxo Raxmo. Harhaar iyo kaalmo waxaa ii noqotey shilimo aan ka qadey Cali iyo Farax Ma seexan mana nasan ilaa aan diyaar u noqdo in aan kaxaysto.

ma ii ogolayn noloshaydu inay ku xisaabta-
nto dhaqaalahayga waxaa uga daraa Raxmo oo
ay waydo,markaan diyaar garawgii dhamayst-
ay diyaara u noqday inaan ku dhaqaaqo la-
bixitaan ayaan waraaq ugu qoray si aan ugu
sheego inaan diyaar ahay. Ayaduna si xxx
deg deg ah ayay iiga soo jawaabtay galabt-
ay imaan lahayd.... walina mahayo ma iman-
aysaa,armay imaan waydaa oo loo diidaa in-
ay soo baxdo,shakigaas ayaan dhex galay.

G labtii ay ii qabatay in kastoo ay k
ka dib dhacday saacadii,mar danbe ayay ii
soo gashau iyadoo qabtao dhar aad u bili-
csan,wax nagu dhacayba galabtaas sidii ca-
adada noo ahayd isku maanaan soo boodin fi-
kirnnaxdin iyo farxadd darteed ayaan la hi-
lmaanay. Anagoon is waraysanin ayaan horay
ka dhaqaaqnay.

Muddo kadibna waxaan bas kasii raacn-
ay xxxxxxx siinaay ubaxaya Jawhar. Waa
markii iigu horaysay intaan kabatrtay Rxx
Raxmo ee aanu anagoo aamusan wada socono
shakiga nafta ku jira ayaa u sabab ahaa?

Magaalada Jawhar markaan tagnay ee
aan kadagnay baskii waxaan casho u raadsa-
nay baar aan qarsoodi ahaan u doorranay,
sidii ayadoo la wada daawanayo ayay aad
u xishoonaysay in ay cashayso,waa gabbee-
de waligeed nin lama cashaynin mana lala
bixin caawase jacaylkeedaa mawjad kagadisan



awigii ay ku noolaan jirtay dhexkeenay,m
arkaasay aab dartii la aamustay

Waa u saacado uu laayahay jacaylia dh-
bta ah inuuna ku xisaabtamin nolosha iyo
haqaalaha sidaa darteed nafteedu diyaar
ay u ahayd inay ila noolaato iyadoo og a
antayda waxayna kadoo sooratay raaxadii
urigooda tan jacaylku u keenay.
oo yaab ma aha awooda jacaylku;hadaan la-
a been sheegin.

Marka aan ka soo baxnay baarkii ayaan
halinyaro meel u dhaw taagnayd u tagay e
on waydiiyay.

"Walaalayaalow iga raali ahaada waxa-
dna ii sheegtaan meeshallaga helo qaadiga
agaalada" iyagoo si naxariisle u dareemay
odsigayga,ayay si wanaagasan iigu tilmaa-
een,anigoo aan lahadlin ayaanu isasoo da-
a galay mudo yar kadibna waxaanu nimid q
olkii la iisoo tilmaahay,markaan garaac-
ay waxaa naga furtay gabar yar markay fa-
antay waxaan doonaynay ayay ii tilmaantay
o igu tiri.

"Qolkaas ayuu ku jiraa".Sidii ayaan
galay "Fariista...Fariista" ayuu nin da'
h nagu yiri. Laba ganbar oo halkii taalay
yaan ku fariisanay,intuu noo soo jeesaday
yuu igu yiri.

"Haye wiilkeey maxaa idiin darnaa?"
"Haa waxaan doonaayay...? dantaan u

nimid ayaan u sheegay su'aalo badan kadib na waa laygu meheriyay,wuxuuna balan noo qabtay barri sadexda saac oo aan kasoo doonano warqadii meherka.

Anagoo shib ah ayaan kasoo baxnay habeenkaas ima soo marin mid iiga farxad badnaa;inkastoo ay jirto dhibaato nololeed hadana dan kama lahayn.waa gare naftaa wehelka ay adduunka ka dooratay heshay.

Waxaan ku goostay inaan habeenkaa Huteel seexano,inkastoo ay Raxmo iga diiday oo iga codsatay inay lassexato gabar ay isyaqaaneen,anna aan huteelkayga iska seexdo sidii ayaanu ku heshiinay kuna balanay in barrito subixii aan ugu tago guriga ay seexanayso. Habeenkaasna in kastoo ayna iisuurto galin qorshahaan lahaa codsigeeda ayaan u meel mariyay.

Anagoo faraxsan ayaan ka soo baxanay degmada Jawhar oo aan wadadii xamar afka soo saaray,Raxmo ao yaab iyo farxadba ay kamuuqdaan ayaa gacanta i qabatay afka intay ii soo dhawaysay ayay i waydiisay su'aashay,"Cabdi aboowe xamar meel aan seexano xagee baan ka helaynaa?" "Kolee dantu waa lagama maarmaan.. qol yar oo aan hal sariir dhiganay,iyo alaabo lagu adeegto w waa jiraan;xataa dhiixul iyo xoogaa raashi n ah oo aan maal maha hore ku dhaafno ayaa jira



ku dhaafno ayaa jira"ayaan si dareen leh ugu sheegay farxad intay la dhaxday ayay gacantaydii ay haysay xoog u qabatay intay isoo fiirisay sidii laba qof oo hada is barbanaya ayay igu tiri.

"Cabdi adiga caqli kaama maqna... danwooyee khaladka nolosha aad ayaand isaga ilaalisaa".

"Jacayl wax ma ilaawo" ayaan ugu jawaabay,markii noogu horaysay ayaan si farxad leh uwada qosolnay.

Qol yar oo cariish ah dantaydana aan ku miisaamay ayaan todoba barri ka hor xaafadda waaberi ka ijaartay inkastoo aan jeclaa in guri lagu noolaado,iyo aroo lagalo kii ugu fiicnaa aan Raxmo geeyo,hadana dani kaa adage kaasaan dooranay,oo w waliba aanu ku faraxsanahay.Wanaagsanaa jacaylku markuu ka xoroobo shuruudaha.

Xarar waxaanu soo gamay lixda saac ee duhurnimo,ceelgaab markii aanu ku nimid baskii aan siinaay kasoo raacnay ayaan hadana mid kale hambar afar u raacnay, marka aan marayno shineemo soomaaliya hoetaada ayaan ka degnay una lugaynay gurigii,intaan furay ayaa si kalosooni leh ugu fariistay sariirta kuna iri.

"Raxmo qado ayaan noosoo qabanayaa ee isii sug." si ged deg ah ayaan u soo baxay baar noo dhawaa ayaan ka siin qabtay

Qado anoo deg degsan soo laabtay. Kalgacaylka aan u qabo inaan raali gareeyo ma ahan mids aan soo koobi karo, markaan wada qadaynay, oo aan mayranay; woxoogaa nasanay ayay aragtay in aan fikiranayo waxayna igu tiri.

"Cabdi aboow fikirka badan iska daa. O gowna in wax kasta oo nagu timaadaba aan diyaar u ahay inaan kaala qayb qaato noloshaadana aanaaba soo doortay, xun iyo sanba waa igala qiimo badan tahay adduun koo dhan markaa iga daa fikirkaagaa i dhibayee". Isma ogayn mar aan ku booday iskumaray oo aan dhunkaday .
aamuskaa ii roone waa ii caado in erayada Raxmo ay qalbiga danqaan.

Qado kadib ayaan go'aansanay in saaxiibkay Cali aan lasocodsiiyo xaalkaan, haduu heli karana aan waydiisto, maadaama ay gacantaydu marnayd; hawlo badana ay idugayeen. Intaan dharkii xirtay ayaan soo baxay, Raxmo ayaa iyadoon ila hadlin gacanta iqabatay oo igu tiri.

"Aboowe fariiso sariirtii ayay igu fariisiday oo hana igu tiri,

"sug sug "boorso ay wadatay ayay soo qaaday oo intay furtay kasoo bixisay lacag fara badan, hoostayda intay soo dhigtay ayay igu tiri?

"Waa labaatan kun toban maalmood ka



hor auaan dahab kay ah gaday, maadaama uu dheereed igu ahaa, markaa maadaama aan danteena ogaa meel baan is dhogay .."

Waxaad doonto ku damee, laakiin waxaan ka codsanayaa in barito aadcwadaad doonaysid si aan u ducaysano", waa aan kayabay fikradaha miduhatan kale ka daran tahaynaxdin ayaan wax aan ku had.o garan waayay, markaasoo, n sal mugii u fariistay oo aan si buuxda u fiiriyay sidii anigoo ay maanta iigu horaysay. markaan wax aan ku jawaabo garan waayay ayaan anigoonsii baxaaya ku idhi.

"Waa yahay; anoo farazsan oo dhamaanba naxdintii aan qabay addunka kabaxay ayaan saaxiibkay Cali soo aaday", isu dhawaa wax helka iyo wax la'aanta, faraxa iyo naxdintu, qosol a iyo oohintu" intaas ayaa maan kayga ku soo dhasaday, markaan ku baxay foomadii yarta ahayd saaxiibkay Cali ayaan u sheegay xaalkayga iyo sidii ay arini iigu dhamaatay, muddo yar markaan lasheekaysanayay ayaan ku soo baxay ?

Si aan barito ugu diyaar garoobo ayaan habeenkii hore ugu seexday. Subixiina hawlahaygii galay dhamaanba markaan soo diyaarsaday, ayaan hadana wadaada) dii u yeeray, halkaad oo ilaa gababtii ay ku ducaynayeen, kadibna waxaan u yeeray dhawr dhalin yaro ah oo ay kamid ahaa yeen Cali iyo Layla.

Iakstoo ay anga noo yahayd farxad aad u balaaran,laakiin dhalin yaradii timid wixuu u noqday arooskii ugu yaabka badnaa si farxadle shaki la'aan iyo gacmo furan ayaan ku soo dgawaynay cariishkii kululaa ee aan sideed qof ka badan qaadi karin,waxaan u dayray sheeko soo maali ah;ileen waa hiddo iyo dhaqan. Layla oo wadatay kaamero ayaa sawiro fara badan naga qaaday,qosol iyo farxad ayaan habeenkaas ilaa afar saac ku wada joognay.

Mar danbe ayaan soo wada sagoontinay dhamaan dhalin yaradii ka soo qayb gashay xafladda xasuusta leh. Waxaan ogaaday in jacaylka dhabta ahi uu yahay shayga ugu qaalisan nolosha hoyga lagu dhisana uu yahay mid aad u adag,waxaan dareemay farxad aanan soo koobi karin,fakarkii nolosha ee aan ku dhexjirnayna waan ka baxay,laga bilaabo maalintaas yaabka iyo farxdaba lahayd waxaan dhex galay nolol raaxo leh,waxaana ii macaanaaday dhammaanba dareenka nolosha ayaan macaan ii noqday.Runtii waxaan ogaaday in guurku yahay shay aad u qaali ah oo noloshu ayna sina uga maarmin.

Xaaji Cumar markuu ogaaday Raxmo inaan guursaday ayuu dacwo u guntaday,laakiin fikraduu rabay waxaa u diiday inay meel marto jacaylkii Raxmo.



ka dibna waxaan talo ku goostey in Raxma layla xooro,kadibna waxaa laga tir tiray liiskii caruurta reer Xaaji Cumar"Manaan dhalin!"ayay hadal uga soo hadheen,hasaawe magaceedu ku jiro hadey maqlaana wey uga kacaan meesha,maadaama ayna awooda jacayl wax ka ogeyn,filan waa iyo mucjiso ayay ku noqotey in Raxmo ay dooratey wiil ardey ah faqiir ah,oo foorno ka shaqeeya,riyo aan ka soo hadheeyn iyo naxddin aan ka dhamman ayay la noqotey.

Ma aan u nixin Xaaji Cumar,waayo?waxaan xusuustaa siduu iila hadlay markaan u tag ay inkastoo aan aad uga xumaadey jacaylka Raxmo ayaa igu qasbey in aan naceybkiisa ku noolaan,maadaama uu waalidkey yahay wax aan goostey in aan raali galiyo dibna ugu laabto.In aana ku laaban wanaagsanaan lah aydaa!,wax daran oo yaab leh ayaa iga soo raacay,dagaal ayuu ila galay.

Raxmo markaan u sheegay aad iyo aad bay uga xumaatey,ayada qudheeda mudo laba jeer ah ayaa si xun loo soo galay,sidaa dartee d waxaay goáanstey in ay waayo kale mooyee dib danbe ugu laaban,aniga iyo reer xaaji Cumar ismaan dhaafkaas ayaan ku kala nooleyn Waqtigu Qaali ayuu igu noqdey ,waxbarasho iyo shaqo ayaa saacadaha maalinti.......

ukala qaybiyay nolol raaxo leh,dareen wana
agsan ayaan dhax galay .Cali iyo leyla waa
lo aan booqashada agala hadhin ayay ayaa
Maalmaha aan ka soo maray aduunka intoodi
wanaagsaneyd ayaan dhax galay,wax la aant
iyo wax yaraanta nololeed waxaa ii kabay
kalagacaylka raxmo,kuna iloobey fkir uyo
xumaan toona.Waan la dagaalay xumaanta oo
dhan kana adkaadey dabadeedna ka adkaadey
nolosha,kalagacalka noo dhaxeeya ayaa ii
noqdey buundo aan kaga gudbo xumaanta oo
dhan .

guriyo samo ayuu Ilaah iiga dhigay Qolki
cariishka ahaa muddo Lix bilood ah markan
ku jiray ayay Raxmo uur ii yeelatey,markas
y faraxadii nolosheeydu laba jibaarat ey
riyadeeyduna waxay u janjeedhsatey in run
aan dhalay mar ciyaarsiiyo,rajo gaar ah a
yaan ka qabey aragati ilmo aan dhalay,waa
ihii nololeed oo wada raaxa ah ayaan ku n
oleyn.

## VIII

Raxmo markii ay ogaatey in dantu ku
wanaagsan tahay in loo wada guntado ayay
horay ka iibisay dahabkeedii...........



adeerkeedna ka soo qqdatey waxoogaa lacag
ah aayna talo ku goosatey in ay suuqa waa
bari ay daas yar ka sameeysato. Galab ayaa
anigoo baxaaya intey gacanta i qabatey in a
fadhiisisay ayay igu tiri"Cabdi aboowe wax
aan doonayaa in waxoogaa lacag ah oon ahy o
aan suuqa waabari daas yar kaga sameeysto,si
aan mustaqbalkeena aan ugu hiranno" anigoo
aad uga yaaban ayaan ka codsadey in ay iska
dhaafto dhibkaas,waxayna iigu jawaabtey"Dan
ayaan la dhaafi karin waa in aan iska kaa
shanaa"hadalkaasu wuxuu igu noqdey albaab
aan dhana loo dhaafi karain waana ku raacay
fikiradeedii,waxaan la yaabey fikirada
Raxmo ee runta ku saleysan.Maalintaan is
baraney ilaa maanta maalinba maalinta ka
danbeeysa ayuu kalgacalkeedu kor iigu sii
kacaayeay ilaa uu mid mid u galay xubna
ha jirkeeyga?

Qorshahaygii nolosha markaas ayuu ii
kabmay ilaa uu heer wanaagsan ka soo gaarey
halgan adag ayaanu kaga gudubnay maalmihii
xumaa dhankeeygana dhawr jeer ayaa mushaarki
la ii kordjiyay,maadaama aan shaqadii si
wanaagsan u gutey,iskooliii imtixaankii a
an ku dhammeyn lahaa dugsi sare asagana si
wanaagsan ayaa u gudbay,shido gaar ah oo
iga hartey ayuu.........

noqdey nolosheeydiina waxaan isugukeenay in aan shaqeeysto.

Waqtiyada aana shaqada lahayn daaska ay aan gadi jiray,mar ksta waxaansoo xusuus an jiray ereyadii waanada ahaa ee Raxmo, kuwaasoo dhab ahaantii sabab u ahaa farx da aan maanta ku jiro.

Ma jirin dhibaato aan ku seexanno,iyo rafaad aan ku soo toosnno,aduunka oo dha n ubax qurux badan oo faraxayga loo abuuray ayuu ahaa,niyad mideesan,moraal hagaagsan iyo jacayl dhab ah ayaan ku nooleyn,Saga lkii bilood ee dumarku ku dhalli jiray ma rkii ay dhammeysatey,ayaan u diiday in a y meela guriga uga baxdo,waxsan iyo Aloow khayr ayaan galay,inta badan hadaana sha qo jirin gaarka ayaan a hayn jiray,daris ka intaan filaayo in ay fiican yahiin ay aan ka codsadey kalana dardaarmey in hadan maqanahay ay gargaaraan.Walwal iyo walaac aana dhan uu ka yiùid garaneyn ayaa igu biloowdey,in maruun aan arko Raxmo oo ka la nabad timid ayaan jeclestey.

Diyaargareeyn waxay cuni lahayd laba bilood ka hor ayaan bilaabey,waayo qof k ale oo aan ku halleeyo ayaanba jirin,waxaa na ahaa,walaalkeed,waalidkeed iyo seygeed anna waxaay ii ahayd intaasoo dhanba.



Qofba qofka uu jecel yahay ayaa u waalid una walaal ah,Raxmo intaasoo laysku daray ayay ii ahayd markaan guriga ka maqanahay waxaan ka awalaacaa oo aan ka shakiyaaarmay dabadaa wax noqotaa,

Galab arabaca ah oo ay saacaduu ahayd9kii galabnimo ayaa intaan shaqada u kicin la h adlay kuna iri.

"Raxmo Maryan ayaan kaa la dardaarmay had ii ay wax soo kordhaan kala xiriir"ayadoo faraxsan ooqoslysa ayay iigu jawaabtey.

"Cabdi aboowe fikirkan badan iska dhaaf, wixii Ilahay kuu qoro lama waayo,walaacna wax kaama badalo"si dareen leh ayay intaas igu sheegtay,ayadoo ka xun fikirka a muuqda dhafoorkayga.

Intaan si dareen leh dhabanka uga dhunka day oon lacag u dhiibay ayaanka soo baxay" Ilahayoow ayaan badanaa ayadoo nabad ku ka la timid qof arakay"ayaa uurka iiga soo dha cadey anoo sii baxaaya.

Galabkaas waaan ka roonaa fikiradahii fara ha badnaa walaacii iyo shakigii aan ka qabay uurka Raxmo ima dhamaan shaqo shaqo la'aanba haddaana la joogin mar kasta waan ka fikiri jiray

Markaa waxaan ku alla bariyi jiray in w ax nakala qaada Ilaahay naga koriyo.

Galabtaas Wax igu dhacay anoon war ka ha yn Naxaddin aan fahmi waayey Qalbigeeyga so oo gasjay,markaasaan ka soo baxay shaqadii soona aadey Gurigii.Meel dhexe markaan mara ayo ayaa daal aan caadi ahayn igu habsadey "Bismilaahi Raxmaani Raxiim!"Maxaa igu dhac ay?"ayaan nafta su'aaley."Mooyi!"ayaan had ana isugu Jawaabey.

Socod aan caadi ahay ayaan bilaabey,sidi i qof Baabuur ka dhaqaaqaayo ayaan aad u deg degay,jiirada gurigeyga looga leexddo ayaan orod ku soo galay.Sidii qof waalan ayaan u Socdey.Naxaddin isoo gashay darteed ayaan la qaboobey,Talaabadiina isaga kay darsant ey,Markaan Gurigeeygii ku arakay dad badan oo shirsan

Anigoo aan war ka hayn in aan ordaayo iyo in kale ayaan daaradii horay ka soo gal-ay.Nafta ayaa sugu weeydey intay indhaheeda wax ku arkeeyso,markaasaan islaan guriga ka soo baxdey su'aaley oon ku iri.

"Eedo Maxaa dhacay?!".

"Ala eedo...Ala eedo ma gabadhaad qabtey?"

" Haa m..X..a !"Wax hadal ah ayaan ku sii dari waayey.

"Samir iyo Iimaan Ilaahay ha kaa siiyo"

"Yaah Ma ...?!"Qalbiga dhaxdiisa ayaa



"Qac"iga yeedhey,Wadnaha ayaa "jug"iviri Marakaasuu maanku igadoomey,maskaxduna i rog natey, indhuhu markay dam iviraheen,ayaan da-rbiga haabtey,sidii qof suuxdin qabana anigo gariiraaya salka dhulka la helay oo aan fadh-iistey.

Maqalka dhagaha ayaa aad iiga xumaadey,ma rkuu qalbigu soo gadoomey,dadka hadalkiisa in yar ayaan ka maqlaayey,dhawr ragah oo mee-sha taagnaa ina aragtey in aan khatar ku su gnahayayaa labada garab igu dhagay,si aan u qaboobo ayuu midu igu yiri.

" Ma qof aan dhimaneyn ayaa jira?!Qof kas ta maalintii loo qoray ma dhaafayo hoohina wax aay tarto daave waaba danbi,Markaas samir qaadoo naftaada khatar hawsoo jiidin!" Hadal iyo waano wakhti uma hayn,aad avay ii dhibaa veen kalmaduhuba,cari ima hayn,laakiin naxdin intay iga badateyayay naftu qaboowdey,markuu dheefshiidku iga joogsadey,anigoo madaxa luga ha iyo qalbigaba kabuubyo iga fuushay,laakiin aragga indhuhu uu wax yar ii soo noqdey,ayaan ragii qacmaha ihayay intaan tabar iska baadh-ey iska fujiyay oon gurigii horay u galay.Ha danna waa lav qabtey,markii loo baqay naftee ydu inay wax noqoto .Ayagoo i haya ayaan had-al iska baadhey oon si tabar daran u iri.

"W.S..o.O a.r.k.i.y.e I/d.a.a.y.a"nin ka mid ahaa ragii.....

oo fahamey ujeedada hadalka ayaa igu yiri m
"ma inaad soo aragtaad rabtaa?!"
"Haa!"
"Daaya ha soo arkee..."ayuu ugu bandhigay
ragii kale,anigoo naxsan ayaan horay u gal
y gurigii,waxaana kor istaagay meedkii,ma
kasaan nafta su'aashan is weydiisay"Hadda
na dhabaa in Raxmo dhimatey oo aan dib da
he u arki doonin?!,ma garbaa in rafiiqaygi
nolosha iyo faraxaygiiba aan saa ku kala t
gno?!.Hadda qofkii aan ka tagay asagoo fa
xsan oo i waanin haya in hadda laba kala a
duun aan kala joogno?!"AN GOO KU DHAX JIRA
jaabkaas aduunka ee dhakafaarka igu noqdey
ayay islaan meedka kor joogtey igu tiri.

"Ilmihii ay dhashay isaguna waa raacay,a
uunkan shidadiisa ayay isaga tageen,dhabti
na wey adeen meeshii laysugu tagi lahaa";
wiilyahow biniaadan awood ma lahee waxaba
naftaada ha dhibin ayay igu waanisay"Waan
maqlaayay hadalkeeda,inta badanse ma fahmi
jugtii qalbigeeyga gaartey yaa sidii weel
jaban hadalka u qubeeysay,maankayguna ma d
reemeyn ujeedada ereyada.Riyo ayuu ila aha
hadalkeedu;Nafta ayaan guubaabiyay oon dhi
galiyay naftuna way adkeeysan weeydey mark
saan go'ii cadaa ee ku dadnaa kor uga qaad
ey si aan wajigeeda u arko in muddo ah aya
fiirin ayay ayada,maankaygana waxaa ku soo
dhacay ereyadan.



Hadiwaa aduuyooy
Halis iyo dhib badaney
Habqan iyo rafaadiyo
Hoog iyo dhibaatooy
Hubaal miyaa kalgacalkii
Rafiiqii haboonaa
Hayaankaygi noloshee
Heensaha macanaa
Ayaad maanta heertoo
Aan ila hadleynoo
Ka hagaagtey dunidii
Hayaankii aduunkoow
Hasaawihii kalgacalkoow
Habqankii Xasuustoow
Iga wada hanqaarkoo
Ku hongoobey noloshee
ii hooya aqaro
Bal in aan Raxmuun helo.

Markii la arkay talo halkay iga taagan
tahay iyo in aana ka soo kor dhaqaaqayn
ayaa garabaha layga soo qabtey,dibada aya
laykeenay,ayadoo laysii farsisinaayo ayaa
laysugu baaqay in aan waalahay maadaama
jugtii igaadhey aan la jaha wareeray.Anoo
halkii fadhiya ayaa islaanu biyo ii keen
tey,madaxa ayaa luxay si aan ugu sheego
in aana rabin.Waayo muraayadii qalbiga
ayaa inub a meelku dhacdey,waxaana ....

isku dayey inaan soo uruuriyo koleyse laga-
ma yaabo inuu sidiisii hore ku soo noqdo.
Ileen naftu maalintii loo qorey kama hor
marto,kamana dib dhacdo,Ileen naxddin loo
ma dhinto,inkastoo aan naftu iga bixin,laa-
kiin maankaygu miyir wuu ka tagay.

Daris wanaag lehe maamulkii iyo aaskii
meedka ayaga ayaa u guntadey,kadibna markii
an arl een in aana wax kala ogeyn oona dhameys
tireen.Galabkaas wuxuu ahaa midkii aduunka
igu naxaddin badanaa intaana soo noolaa
iguna naxddin badnaan doona haddanba sii
noolaado.Ma sheeki karo habbeenkaas meel aan s
seexdey iyo in aan soo jeedey toona,laakiin
waxaan nolosha in yar ka fahamey markuu wagu
baryey ee aan mar kale dul imid qolkii yarka
ahaa ee uu meedku ku jiray,oo subaxaas ii lahaa
naxddin dheeraad ah.

Markiiba baabuur iyo dad badan ayaa isugu yim
guriga.Caro ayaan la gariiray,markaan arkay nar
naxash intii baabuur laga soo dajiyay guriga
lala sii galayo.Rajo yar oo igu jirtey ayaa iga
baxdey,markaan arkay Naxshka la wado.Markii
meydkii la soo saarey naxashkii ayaan kor u
boodey oo aan u tagay.

Markaan arkay in xaalku dhab yahay,Raxmana dib
danbe loo arkayn ayaan.



awood iska baadhay oon maagay in aan wax ka qaado
qaado,nasiib daro maadaama layga shakisnaa
saaxiibkay Cali oo markuu iwaayay subaxaas
salaan iigu yimid lana kulmay mashaqadan igu
dhacdey ayaa meel ifdhiisiyay,nafta ayaan la
hadlay oo aan su"aalay"kaalay miyaad waalan tahay?
maya mase fayoobid,toloow maxaa igu dhacay?
waa la wada dhintaaye qo aan dhimanyn miyaa
jira?..Laakiin Raxmo aad faraxad kaga tagtay
haddana sariirtii lugu qaadi laaa la wado.."
naxaddin ayaa i dhax martey sidii danabkii,mar
kasa an saliilyoodey,markaan fadhin waayay aya
n kor uga kacay oo haddana meydkii kor istaagay
markaan soo kacay ayaa hoos laysaga baaqay.Tala
na lugu goostey in layga fogeyo inta meedka
baabuurka la saaraayo,sidii ayuu saaxiibkay
cali asagoo sidii ilmo caruur ah ii sasabaaya
iga soo dul kexeeayay markuu arkay dareenka waali
d ah iyo doorsoonka igu dhacay ayuu ilmo uuna
celin karin ku soo istaagtey,si aana u fahmin a
yuu la sii jeedsadeyoo igu yiri.

"Cabdi halkan ayaan joogsaneynaaye wadada ina
ga keen"Waan soo raacay sidii ilmo dhalaan ahayaan
wixii laydhahaba yeelaa,aad waxaan uga yaabay naxdi
mooyee ilmo haba yaraatee iskuma arag,malaha xubn
hii

Ilmada soo deyn jiray ayaa naxddin la hawl gal gabay,meedkii oo na ash lugu wado ayaa ili nka laga soo saarey"Laa Ilaaha Illallaahu... Laa Ilaaha Ilalaahu"ayaa la wa a lahaa qaab aan u dhax galay ma xusuusan karo laakiin wax aan isku dhax tuuray;;ayaa hadana layga soo qabtey,saddex nin oo Cali ga mid ayay ayaa baabuur weyn shirka iga saarey,halkii ayaan ka soo dhaqaaqn y,baabuurka aan saarahay wuxuu daba socdey ambalaastii meedka lugu wadey.
[illegible]
Ma dhabaa in Raxmo daqiiqado ka bacdi ay go"d galeeyso?!"ayaan is weeydiiyay,Jawaab kulul ma kaan helayna waa ka soo laabtey.

Baar Xaraf Mar aan in yar dhaafney;ayaan dhinaca midig uga leexaney laamiga;jid ayar oo jeey ah markaan in yar ku sii soconay waaan tagney qabuurihii.Ri"yo ayay ila ahayd hawsha meesha ka socota,marba marka ka danbey sa ayay naxdintu sii badaneysay,hadda markaan arkay sida loogu kala ordaayo in la aaso,ayaan hawo dhigay,naftayda ayaa aduunka kohasho ugu laabatey."Caku aduunka iyo geeridaba ayagaa dad is jeceleysiiya oo hadaha kala qaada,ayagaa ka farxiya ,hadana ka naxsha"Bad weyntaas aan ku dhax jiray waxaa iga baraarujiyay sheekh ii.



yimid oo intuu gacanta i qabtay igu yiri.

"Adeer dambi weeye fikirku wuxuu ka t-arina ma jiro ee ina keenoo qofka iilka wax ka dhig waxaana lagaaga baahan yahay in mar-kaad dhigto aad cafiso ood tiraahdo waan ca-fiyay".

"Waligeedba dambi igama gelin", ayaan ugu jawaabay, intuu madaxa jiljilay ayuu i gu yiri.

"In aad cafisaa lagaaga baahan yahay... Iilkana wax ka dhigto ayaa lagaaga baahan yahay".

Daqiiqadihii adduunka iigu darnaa ay-aa i soo hor istaagay, waxaana lagama maar-maan noqotay in aan Iilka wax ka dhigo si aan ugu duceeyo. Waan is dhiirri geliyay is-kuna canaantay,"Gal godka!", sidii ayaan ku galay laba nin oo sii joogtayna ugu saddex-eeyay, in yar kadib ayaa naloo soo dhiibay maydkii.

Naxdin ayaa qalbigu la ruxmay markii maydka farta nalaga soo saaray, naxdin dar-teed ayuu garaaca wadnuhu ii batay naaftuna si deg deg ah ayay sambabadu u qaataan una saaraan. Meeshii Iilka loogu tala galay ay-aan dhignay, hadal ma jiree cafisna ma ool-ine oo waligeed dambi igama geline, uurka ayaan uga duceeyay in wax dhiba Ilaah la ku-lminin. Naxdintaasu waxay beddeshay oo ay doorisay miyirkaygii, igana qaaday awoodii

garashada markaan in muddo ah naxdin la qa
alsanaa qabriga gudahiisa oo aan ku dhax
raynowjad aad u kharaar iyo xusuus kulul
ayaan hadana nafta weeydiiyay"Ma [illegible] oo an
an kuu abaal gudin ayaad iga tagtey?!Ma dh
baa in aduunkii aan kaa weheshan jiray shi
adiisa aad igu soo deysay?!,ayaan ka wehes
an aduunka?!"Waxaan isku iloobey xusuustii
kululeyd ee Qalbigeyga soo gashay,anoo wal
sidii ugu dhax jira,ayaa markii layga yaab
lana arkay inaan soo baxayn layla hadlay o
laygu yiri.

"Ka soo bax!..Ka soo Bax!"Gacan ayuu Cal
isoo taagay si aan uga soo baxo.

Markaan banaanka soo joogsadey,ayaan ga
u fiirshay...Ilaa foostadii laga saaro,xa
kiina lugu dul shubay,ka dibna intii laga
oo baxay ayaa lugu bilaabey cidii.laga so
qodey godka."Laa Ilaaha Illallaahu..Laa Il
ha Illalaahu"si aan naxariis lahayn ayaa
dii loogu boobey.Waa god nin walba sugaaya
oo xaqah,waa habeenkii nin kasta canalkii
wuxuu ku kastabadey u tagaayey,waa amar q
kasta soo mari doona anagana digniin noo
si aan xumaanta nafta ugala fogaano.

Waa isbadalka aduunkee meeshii hadda go
ka ahayd,shan daqiiqo ayay buur isu badesh
wali halkii ayaan yaab iyo naxdin la.....



taagnaa,uurkeyga ayaan dib ugu laabtey"Hawo
lagama qabo in qof halkaas tagey ka soo baxo
Caku qabri muxuu dad isjecel kala hayaa!!"
intaas ayaa igu soo dhacadey,hareerahayga
ayaan fiirshay,in muddo ah ayay indhahaygu
ku daaleentiro badnida qabuuraha,intaan mad-
xa gilgilay ayaan isugu jawaabey"Intaasoo
xabaal ah mid kasta qof ooyaaya,ayaa ka dul
dhaqaaqay,shido badanaa noloshuba!".

Markii howshii laga faraxashay ayaa baab
uurtii la koray,anigoo shib ah ayaan fariis
tey,muddo yar ka dibna nafta ayaa i weydii
say."I Awey Raxmo?!,ma katagi?! sida dadka
kale miyaad ka dhaqaaqi?..Maxaan sameeyaa?
dag oo la joog..Miyaad waalan tahay waa lug
ula yaabi in aad waalantahayna luguu aqoon
san,maxaad u qaban kartaa hadda la joogo mi
se qabiriga ayaa Raxmo kuu noqon!? "Markaan
ogaadey in ay ii dhammaatey Raxmo oo aan dib
danbe u arko,in aana waxba u qaban karina
gartey,ayaan caro darteed darbiga shukaanta
baabuurka labada qacnood ku feerey,ilmo kul
ula markii ugu horeysay iga soo daadatey.
"War qabta!...War qabta!"Cali iyo nin kale
oo ila saaraa baabuurka markii horana iga
shakisnaa,ayaa igu dhagey,ayagoo u haysta
in aan waalahay ayay igu waaniyeen.

"Naftaada ha dhibin shalayto iyo fikirna waxay kuu qaban ma jiraan ee naftaada xumaatada ka dayso", hadaladaasu wax kama qabanin dhibaatadayda, af hadal ka soo baxay ayay noqdeen. Weli waxaan maankaygu ku maqnaa naftu mar waxay isku guubaabisaa samir, marna riyo ayay la noqotaa iyadoo u jeedda dhabta.

Waan ka soo tagnay markaan qabriga ku hubsanahay, qalbiga waxaan ku yeeshay boog wayn oo mar kasta oon Raxmo xusuustaba iga danqata, waaboog aan qofna ila ogayn dareenka iyo xusuustana ku danqata.

Guryihii ayaan nimid mar labaad ayay naxdintii i soo gashay, markaan hoo hor joogsaday qolkii yarka ahaa ee aan Raxmo nolosha iyo farxaddaba ku soo qaybsanay, caawana waa shib markaan soo hor joogsaday ayaan qalbigayga la hadlay.

"Ilaahayoow yaanan gudahaaga gelin", ayaan xanaaq naftu isugu sheegtay sidii isagoo geerida keenay ayaan u carooday meel kasta oo aan fiiriyaana waxay igu noqotay muraayad aan ku soo xusuusto Raxmo.

Duco iyo qur'aan akhris ayaa saddex maalmood lagu jiray, intaana deriska ayaan la seexan jiray, hawo iigama jirin in dib dambe aan foodda u geliyo gurigayga, naxdinta markaan arko igu habsata, iyo naca aan u qabo ma ahan kuwa la soo koobi karo,



Iu[illegible] farxo ka [illegible], [illegible] qosol l[illegible] [illegible] u [illegible], marna [illegible] [illegible] ayaa[illegible] k[illegible] bo[illegible]a [illegible]to [illegible]ulul [illegible] [illegible]rkii [illegible]lka[illegible]u uu [illegible]rt[illegible] [illegible] fa

kaligeeyna ma ahee wax oo Raxmo isoo xusuu siya ayaan necbahay. Nafteeydu raaxo adduun iyo farxadba way ka samirtey, xaragana kanshaba um a hayso, qosola haba sheegin, markaan boog weyn qalbiga ku yeeshay, ayaan nolosha ka samray. waxaan bilaabay in aan kaligeey qalbiga la sheekaysto. ad ma raaco, darisna lama hadlo faraxada iyo qosolkuba waxay ka mid noqdeen waxa aad ii dhibaee boogta iga danqa, dumar mi d uur leh hadaan arko laba gacmaha ishaysta hadaan arko, sheeko jacaylba markaan maqlo, ay aa boogtu danqataa, marakaasan ka cararaa. Shal e intii ii roneeyd ayaa maanta ii daran oon nafta ka ilaashaa.

"ayaanka maalmaha ayaa meel xun igu hubsadey qalbigeeygan hoos u galay oo hal cad ka jaray qalbigeeyga. Si loo Qadkaas ayaa wali ka maqan qalbigeeyga. Si loo helo adagaa, waa in Raxmo la helaa, waa in aan Raxmo maankaa ka tiraa, si aan u xusuusan, taasna waa calaacal timo ka baxay, noloshedu waxay gashay in aay iska ilaaliso xusuusta Raxmo, mana iska ilaaliso.......

ee wey is xusuusisaa markaasey iska danaqd aa .Naftuba dhib badanaa.

Waxaan ka go'ay dad la hadlaki sheeko iyo la socdki ayaan ka doortey wehelkoodaba.Dad dale daayoo cali oon mudo isla nooleyn saax iibna a hayn ayaan kaftankiisa dhibsadey,ma qoslo mana ooyo faraxdna hadlkeed daa,nolol dhadhan kharaar mooyee aan wax kale lahayn ayaa ii bilaabatey,mararka sidii dadkii wa laa ayaan kaligeey isla hadlaa?Waa gare naf taan is arkaa waayo qalibiga aan qanicin ra bey,isle ... isna igama yeelo,oo ma qanco ana hadal iyo haasaawe kama daayo,isna igam a yeelo,nafta markaan u caal waayey,isla hd alna ka caal waayay ayaan kaligeey qal yar ijaartey.Markaan shaqada dhammeeyo horaan ka aadaa qolkaas,maraan tagana hoosta ayaa n ka xirtaa si aan qofba iigu soo galain. Naftuna xusuus dilootey ayay horay ka bila batαa,shidaalkii jirkeeda gubi lahaa ayay ku shubataa,taqraqna ku daartaa,dabadeed kulaashaa,wax kastana waxaay ka dooratey in ay qolkaas yar isku dhax xirto.

Mana dhiman nolola ma haysan,shanta waqti ee salaada iyo shaqada intaan ku sugnahay.



Naxdin aad u kharaar nololbayna ii noqotey Magaalo ma aado meela ugama boxo fiidka hore ayaan soo galaa subixiina shaqada ayaan ku soo baxaa,dhallinyari iyo waayeelba waan ka go'ay,sidaa darteed waxaa laii aqoon,sadey in aan waalahay,qiimihii uu qof leh miyir qaba lahaana waa horaan waayay.

Marka aan Raxmo waayay,Noloshaas aan xab siga aan dhaamin ayaan ka doortey adunka. Markii ayaamaha xumi qalbiga boog faraxdu danaqdo ay iiga yeeleen.Waayo waa iga diid ey naftu.Dangashada qalbigaas iyo la sheeke ysigaas nafteeyda ayaa ii noqotey Saaxiibo

Dhallinyaradii aan saaxiibaha ahayn waxay go'aansadeen in aan waalahay mar dhawna aan dharka xoori doonno,weyna isugu key baqaan marka aan ag maraayo.Hadalna uma yeesho ee waan iska dhaafaa qaar i caaya,kuwo iwaaniya qaar igu ciyaara,kuwo ii naxa ayaa loo qayb samey.Sheeko wanaagsan iyo filin qosol leh oo waqtiga laysku dhaafsho ayaan u noqdey.

Dad kale hadalki daayoo Cali ayaa iga sha kisan in aan waalahay.Caan ayaan ka noqdey xaafadaan daganaa,qof kasta markaan iska soo hor baxno wuu iga yaabaa,qaar wey ii naxaan qaara way iga maad sadaan,Aniguse waxaan ka yaabay hadeey jiraan waa dabeecadaha dadka ee kala duwan,qaarkoodna uu waxa laga noxo ku farxo kuwa kalena waxaa......

"ugu farxo farxo ka naxaan. Filin qosol badan ayaan u noqdey, qaara xusuus kulul ayaan ku beeraa, dhibaato ayaa korodhay markii arrin aasu uu caruurta xaafada u gudbey, mararka qaarkoodna, ilaa gurigeeyga ayayna iga daba hadhi jirin iyagoo leh "Wuu waalan yahay!.. wuu waalan yahay!" Dagaal ba'an ayaa maalin kasta na dhax mara aniga iyo caruurta. Wax iga ceshada markaan waayay ayaan dagaal la galay. Waase ogaa in Cabdigan caruurtu daba yaacayso uusan ahayn Cabdigii shalay.

Dharka aan qabo na ahayn miduu qaato qof miyir qaba, mana dhaqo mana dhigo, Sidaa dara deed Muuqaalkeyga in aan waalahay qofkii iga soo hor baxaaba, haddii asxaan laysameeyana wuu kala dhiman yahay ayuu go'aan ku gaaraa aad dan kama lihi. Qof waali igu sheega iyo ku kale toona waan ka samray, adduunkan iyo inta ku noolba, markaan Raxmo god ku hubsadey dad aan la xiriiro daayoo daymadoodaaba i dhibtey. In aanan fayoobeyn waan ogaa, walise dhab ahaan qofna ulama dagaalin, lamana heshiin

Waanno waan ka diiday qofkii wax ii shega wax na ka yeelo, xisaabtan aan nafta la xisaabtamay waa horaa igu danbeysay, markaasaan nafta kala baxay Xadkii loogu talo galay. Hadho qofkii iga qaadaa waa uu iga........



yaabaa, kii horay ii yaqaanayna waa uu iga naxaa.

"Caku jacaylka waa daawo nololeed, iyo fafax nafasadeed, waa dareen aad u macaan, haddii uu xumaadana waa cudur nafasadeed, waana sun lagu dhinto ama halis lagu galo, la'aantii waan hubaa in aynan noloshu qiimo iyo dhadhan lahaanaynin, markaad waydana sun iyo dacar buu ku waraabin ama wuu ku dili hadduu asxaan kuu falana qof lagu maadsado oo waalan ayuu kaa dhigi, waa dareen aan qofna xukumin furaha nolosha oo dhan ayuu gacanta ku haystaa, markuu rabana nafta la xiriiraa sida uu rabana qalbiga u galaa, ugana baxaa."Culumada adduunkee Caafimaadka Baartaay cudurada labar goyn caashaqa ha lagu daro!", beri hore ayay Abwaaniinta Soomaaliyeed codsigaa fidiyeen, inkastoo daawo loo waayay ka dibna qofkuu doono ayuu sidùu doono u galaa, qaar uu waalo, qaar uu dilo iyo kuwa uu duleeyo...dadkaas ayaad ka mid tahay wax ka baxsana ma aadan noqonin"

sheekadaas dheer ayaa ii socotay markaasaan Foornada aan rabay ee Buundada Ansalooti ku taalay soo dhaafay, Ceel-gaab markaan imid ayaan ku soo baraarugay buuqii dadka. Intaan naxay ayaan naftayda la hadlay oo aan ku iri.

"Xaggeed ku maqnayd inta aad ilaa Ceel-gaab soo socotay?" waxaana intaa iiga sii darraa sida aanan u dareemin socodkiiba, ma-

rkii igu horraysay ayaan qosol u hawooday markaan arkay sheekada dheer ee runta ah iyo sida aan ugu soo jid maray.

Waana sheekadaa iyo kuwo la mid ah waxaan dadka uga go'ay ee aan kaligeey isku maaweeliyo. Kollayse isbeddel wayn oo maskaxeed inuu igu dhacay muuqaalkayga ayaa marag cad u ahaa.

Adduunka oo dhan ayaan col u qaadat, markuu Raxmo na kala qaaday, markaasaan Cariishkaa yarka ah ka doortay, waxaanna aamminay in mar kali ah la ii qoray farxadda adduunka, markiina ay dhamaatay. Ma dafeemo Gaajada, sariirtana anoon goglinin ayaan ku seexdaa, qashinka dhex tuuran iyo hannaan xumida ka muuqata qof dani ku qasabtay mooyaane mid kale kuma noolaadeen. Laygama waayo Masaajidka markii Tafsiir jiro, daawo qalbiga wax ka qaban karto ayaan ka helay, maanka oo dhanna caadi ayuu iigu soo noqdaa intaan ku jiro, haddaan ka baxana xusuus iyo walaac ayaan horay u sii qaataa. Midabkaygii iyo muuqaalkaygii waa hore ayay beddelmeen.

Mugdigaa nolosha ee aan Ilaaheey mooyee wax iga daawayn karaa jirin ayaan dhex galay, si kastoo aan isu illowsiiyo qalbigu waa diiday inuu Raxmo iska illaawo, hadduuna illaawina waa u caro iyo caloolyow doodda qalbigu ma daayo, danqashada wadnuhu ima dayso. Noloshaa kharaarka iyo rejo la'aanta ah ayaan ku dhex lumay, qof iga soo doonina ha sheegin.



Galab ayaa anigoo u socda qolkaygii yaraa aan kula kulmay dhallin yaro aan saaxiibbo ahaan jirnay, laakiin waayahan dambe aan kala goosanay. Mar qur ah ayay wada qosleen marka aan ku soo baxay mid ka mid ah ayaa igu yiri.

"Haye Cabdi Boodhari bal ii warran ... waa Cilmi Walaalkii". Qosol aan ka yaabay ayaa in muddo ah lagu dhex jiray, anigoo aan la hadlin ayaan horay u dhaafay. Xusuusta adduunka ayaan gadaal ugu noqday anoo yaabbana waxaa qalbigayga ku soo dhacday erayadan:-

Damacii Jacaylkaan
La dalxiisay maalmoo
Farxad igu deeqoo
Malab iga dur-duurshoo
Dooxooyin doog loo
Ubuxuna dugsiiyoo
Biyuhu ay dur-durayaan
Waayo igu deeqoo
Haddana igala duuloo
Iga damiyay Laydhkoo
Dacar iga waraabshoo
Sunna igu deeqoo
Danqashadii Xusuustaa
Naftaydii diilootoo

Qalbigu waano diidyoo
Samirkii ka durugyaye
Dareenkii jacaylkaa
I dilooday anigee
Dadoow hayla yaabina
Wax daweeya waayaye.

Qolkii yaraa ayaan iska furay, anoo dharkaygii qaba ayaan sariirtii xunta ah-ayd oo aan waligeed la goglinba isku kor xooray. Kharaarraa oo xusuus kululaa hadd-ana danqasho badanaa marka aad waydo qof aad adduunka ugu jeclayd, inaad ka samir-tana ay qasab kugu noqoto, haddana naftu samir kaa diido, ee qalbigu kaa danqado.

IX.

Galab Arbaca ah ayaan dibadda soo fariistay markaan dhameeyay shaqadii Foor-nada halkaasoo aan doonayay in aan ku nas-to. Anoo ku dhex jira xusuustaydii nolol-eed ayaa Baabuur lay soo ag dhigay guuxa Matoorkiisa oo aan dhibsaday dartii ayaan uga soo baraarugay Muquurtaan ku jiray. Indhahayga ayaan aammini waayay markaan arkay Faarax oo ka soo degaaya, anoo yaab-kii ku maqan ayuu igu soo booday oo si yaab leh isugu kay duubay isagoo leh.

"Cabdi bal ii warran Adeer, maxaa kugu dhacay waabaad beddelantee?".

"Waan iska ladanahay", ayaan ugu



jawaabay, anigoo ka yaabban salaanta Faarax ee aanan horay uga baranin.

"Ina keen Cabdi Caawa farxad wax leh ayaan kuu hayaaye", ayuu igu yiri.

"Wax iga farxin karaba ma jiro", ayaan qalbiga ka iri, marka ay igu soo dhacdau xusuus kululi. Isagoo iga yaabban igana na-xsan ayuu igu yiri.

"Wax kastaba ragga way soo mareen dul-qaadbaana looga baahan yahay si uu uga gud-bo. Gacanta ayuu iga qabtay asagoo ka tiir-aan yaysan xumaatada iga muuqata. Naftayda ayaa is waydiisay waxaa farxadda leh ee uu Faarax uu u sheegi karo galabta, waxaanna ku qiyaasay inuu adeerkay war iiga sido, markaasaan waydiiyay oo aan ku iri.

"Maxay tahay Farxaddu?"

"Waa mid aad u wayn oo aad ka yaabayso"

"Waa yahaye ii sheeg waxa ay tahay"

"Maya maya guriga ayaan isu raacaynaa oo aan kuugu sheegi". Anigoo ka yaabban jeceelna inuu ii sheego ayaan ku iri.

"Miyaadan halkan iigu sheegi karin?"

Anigoo aan raalli ka ahayn ayuu si ka-la daadsan iigu sheegay in Adeerkay Cumar uu caafimaad qabo kana shaqeeyo Dalka Kuwayd, wuxuunna ii soo diray lacag badan oo aan dhibaatadayda kaga baxo, si degdeg ahna aan ugu dhoofo.

Hadalkaas markuu ii dhameeyay Ilmo ku-

lul ayaa iga soo daadatay xusuus aawgeed,"Maxay hadda ii tari waxaan waayay inta ay Raxmo noolayd?", Boogtii qalbiga ayaa iga danqatay markaasaan Ilmo kulul xajisan waayay. Farxad ay ii keento bal daaye waaba ay iiga nixisay Aniga oo aan la hadlin ayaan baabuurkii galay halkiina waan ka soo dhaqaaqnay, in kastoo uu aad iiga yaabanaa hadana ima weydiin waxa igu dhacay sidii baanna ku tagnay gurigiisa. Qolka fadhiga in yar markaan wada jogney ayuu intuu kacay igu yiri.

"Cabdi i sug alaabtii baan kuu keeniye", ka dibna wuxuu soo laabtey isagoo boorso aad u weyn riixaaya, mid yar oo Samsooneyt ahna gacanta ku wada, intuu i hor dhigey ayuu cajal iyo laba waraaqood ii dhiibey iguna yiri.

"Cajalkaan iyo waraaqahaas ayuu adeerkaa kuugu caddeynhayaa alaabta uu kuu soo direy iyo lacagtaba, gaar ahaan waxaad sameyn laheyd ayuu kuugu caddeeyey". Weli waxaan sameyn lahaa anigoo aan go'aan ka gaarin, ayay Cambaro soo gashay, markey laba indhood iga qaadeyna igu soo boodey oo isku key duubtey iyadoo leh.

"Alla Cabdiyoow Eeddo xageed ka dhacdey oo laguu waayay?", aad ayaan uga yaabey salaantaa yaabka leh ee Cambaro iyo naxariista maanta ka muuqata, mase aan xumeyna alaabtii intaan u furey ayaan ku iri.

"Eeddo sheyga aad doonto kala bax.



Carruurtiina wax uga bixi", inkastoo aan ogaa in Cambaro ay si aan Islaan loo gelin iila dhaqantey, hadana ma aan ka aar goosane waxay iga rabtey baan siiyey.

Anigoo boorsadii gacanta ku wata ayaan illinka ka soo baxay, in muddo ah markii aan sii soconeyna waxaan tegney xaafadii, alaabtii intaan ka dejiyey, gurigana dhigtey ayaan soo sagootigey. Galabtaas sida uu Faarax ii ciseynaayo, iyo qadarinta ka muuqata markaan arkey ayaan soo xasuustey, galabtii gurigiisa leyga soo saaraayey, iyo siduu hadal la'aan iiga aamusey, "Weligey maalintaa tu aan kaga baahi badnaa ima soo marin, iyadana waxba igama aad qaban", intaasu markey maankeyga ku soo dhacdey, ayaan si kedis ah uga laabtey kuna iri.

"Faaraxoow alla heyna nabad geliyo", anigoo aad uga yaaban is bedelka adduunka ee hadba wax u keena nafta ayaan qolkii horey u galey sariirtiina ku fadhiistey, waxaanna mar keli ah naftu is weydiisey "Xoolo aad maanta heysho, iyo maal aad yeelato midna muxuu kuu tari, ma waxaad ka yaabi in dib dambe aad u aragto farxad, iyo qosol toona, dhib badanaa waayaha adduunka!". Runtii in kastoo galabkaa in aan aad u farxo waayib igu haheyd hadana naxdin iyo danqasho ayaan ka qaadey waxaanna si dhab ah u dareemay in nafteyda wax weyn

Oo aan la heli karin ka maqan yahay.

Si aan u dhegeysto Cajaladii ayaan boorsadii weyneyd rikoorro ku dhex jirey mid kala soo baxay una shitey, in muddo ah markaan dhegeysanhayayna, mar labaad ayaan warqadihii akhristey, si cad ayaan u fahmey dhamaanba wuxuu adeerkey iga doonayay. Anigoo naxdin iyo farxad mid aan ku suganahay kala caddeyn karin, ayaan in muddo ah halkii fadhiyey. Markaan ku daaley hawada adduunka ayaan hadana ka soo laabtey, boorsadii gacanta ayaan furey, aad ayaan uga yaabay lacagta ku jirta tiradeeda. "Caku adduunka..." danqasho qalbigeyga soo gashay darteed ayaan anigoo xanaaqsan uga dul dhacay, sariirtiina ku laabtey.

Habeenkii yaab iyo fikir dartii ayaan la seexan waayay, muddo dheer markaan halkii gal-galasho ku jireyna mar dambe ayaan seexday, subaxdiina Afarta(4) Subaxnimo ayaan ka soo toosey. Anigoo aan kala hagaajin alaabtii aan xalay kala furfurey ayaan ka soo baxay, waxaanna soo aadey saaxiibkey Cali, isagoo aad iyo aad iiga yaaban, waxaan shaqada la mid iman waayay oo inuu soo baxo doonaayo ayaan u soo galay kuna salaamay.

"Cali Saaxiib bal iska warran"

"Waa nabade xagoed ka dhacdey?", ayuu iigu jawaabey isagoo iga yaaban. Madaama uu ahaa qofka keli ah ee aana xaqiisa gudi karin,



Iyo saaxiibka keli ah ee aan leeyahay, waxaan arrinkeyga ugu sheegay si cad. Isagoo aad iyo aad ugu faraxsan ayuu igu yiri.

"Kolley waxaan filahayaa inaadan na ilaawi doonin, waayo dadka qaar waxaa jira markey dibadda tagaan iska ilooba saaxiibki". Anigoo faraxsan oo wada qosleyna ayaan halkii iska soo raacney gurigii oo maalka dhex yaalla, iyo muuqaalkiisu ayna is laheynna nimid.

Markaan soo galley ayaan saaxiibkey Cali ku iri.

"Caliyoow horta adduunkanu waa riwaayad, waxaase haboon in saaxiibka si wanaagsan kuu gacan qabta loo xasuusnaado... Maleyn maayo intaan ifka ku noolahay in aan ku illaabi doono, hadana Boorsadaa qalabka ka buuxa, wixii kugu filan ka qaado", isagoo aad ugu faraxsan, degenaanta iga muuqata iyo garashada saaxiibtinimo ee aan u muujiyey ayuu wuxuu rabey kala baxay.

Anagoo aad iyo aad u faraxsan ayaan ka soo baxney, magaaladana isu soo raacney, habeenkii oo dhanna waxaan ka wada tashaneyney sidii aan ku bixi lahaa.

Markaan soo xirtey dharkii ugu wacnaa magaalada, Boorsana aan soo qaatey, ayaa dhallintii shalay ciyaarta iga dhigan jirey qaar ka mid ah heshiis ila soo galeen, ma yareyn inta galab kasta guriga iigu timaada

Ee aan soo wada baxno, in kastoo aan dhar cusub, iyo muuqaal cusub kahaa hadana Cabdigii qalbiga boogta ku lahaa ayaan-ahay, malaha dharkeyciseeyaane, markaan dhar qurux badan xidhey ayaa cisadii waa hore leyga qaadey igu soo noqotey.

Waxaan aad uga yaabey haddii ay jirto waxay ahaayeen dadka anoon wax u dhimin iska key necbaa, hadana anigoo aan waxba u tarin iska key jeclaa, fara badanaa dadku oo camallo badanaa.

Markaan dhex galey noloshaa ayaan wax yar ka nastey danqashadii in kastoon marmar aan danqado, muuqaalkii Cabdigii Raxmo la noolaa ayuun baan ahaa, qalbiga mooyee. Muddo Afar iyo toban beri ah ayaan is diyaarin ku jirey, ka dibna waxaan soo gabagabeeyey howshii bixitaanka, intaan ku dhex jirey shaqadaana Cali habeenna kama aan harin wuxuu ii ahaa Saaxiibka keli ah ee aanna la'aantii seexan.

Markaan dhameeyey leyna sheegay wakhtiga aan baxaayo, ayaan Leylo u kacay, nasiib darro waxaa ley sheegay iney Jiddah jirto oo halkaan lagu qabo. Ka dibna anigoo ka xun ayaan ku soo laabtey Cali maalintaan baxayay, waxaa garoonka iga soo dhaweeyey Saaxiibkey Cali, halkaasna markii iigu horreysey aan ka duuley dalkeyga.



Waddanka Kuwit markaan tegeyna waxaa si wacan i soo dhaweeyey adeerkey Cumar, iyo saaxiibadi, muddo saddex bilood ah markaan shaqo la'aan ku sugnaana waxaan heley shaqo aad u fiican. Shaqadaasu waxay ii horseedey inaan mustaqbalkeyga kala dumey dib u soo dhiso. Waxaanna howsheyda u gudan jirey si nadiif ah, iyo daacadnimo muddo ka dibna waxaa ley xilsaarey in aan noqdo xisaabiye, Hay'addii aan la shaqeyn jirey.

Waxaan dhex galey nolol aad u sarreysa, guryo wacan ayaa ley siiyey, baabuura waan heley, kolkaasaan dhex galey nolol cusuboo aan ku illoobey jugtii nolosha iga soo gaadhey.

Muddo laba sano ah markaan shaqadaa hayayna waxaan xisaabiyey lacagta Bankiga ii taalla, runtiina aad ayaan uga yaabey faraheeda, waxaana igu dhalatey in aan wadankii ku soo laabto kuna noolaado, xiise aan la soo koobi karin baan u qabey in aan dib ugu soo laabto, dalkeygi hooyo oo lagama maaarmaanka ahaa.

Markaan ogaadey in aan ganacsi wanaagsan ku sameyn karo dalkii heystana lacag igu filan oo aan ku ganacsado, ayaan adeerkey la tashadey, isaguna igama diidine, lacagtuu hayay oo dhan buu farta iga saarey, si aan guryo Xamar ugu dhisano, ganacsigana ugu billaabo.

Si aan hadye suuro gal ii noqotana u sii wato, haddii kalena aan shaqadeyda ugu soo laabto, ayaan fasax dheer u soo qaatey, sidiina kaga soo baxay dalka Kuwit.

Garroonka Dayuuradaha markaan ka soo degey ayaan farxad la dhacay, saxansaxo udgoon iyo leydh qaboow ayaan salaan ka qaatey, halkiina waxaan ka soo raacey Taxi oo aan ku imid Hotel Taleex. Markaan meydhay in yara aan nastey, ayaa naftu ila hadashey oo igu tiri. "Saaxiibkaa Cali ma markaad wax heshaad illowdey?", si deg deg ah ayaan ka soo baxay Hotelkii, soona aadey xaafadii Ansalooti.

Anigoo ka shakisan in markaan tago aan waayo, ayaan horey u galey qolkii foornada, markaan indho ka qaadey ayaan is wheyn waayay oo aan isku duubay anigoo ku leh.

"Saaxiib Cali bal ii warran... Bal ii warran!", maadaama uunan meesha iga filaneyn, muuqaal ahaanna aan aad uga duwanaa Cabdigii saaxiibka la ahaa ayuu ila garan waayay, isagoo iga yaabanna intii iga baxsadey igu yiri.

"War waa nabade keed aheyd waan ku garan waayaye?", qosolkii aan qosley ayuu igu fahmey, markaasuu igu soo boodey oo isku key duubay isagoo faraxa iyo yaabka haya la hadli la' ayuu igu yiri.

"Cabdi ayaad galabta arki kolla maanka ma soo gelin hadana waa yaabanahaye bal ii warran?".

"Waan nabad qabaaye, adigu seed tahay?",



ayaan ugu jawaabey muddo yar haddaan halkii salaan iyo sheekaba ku heysaney, ayaan isa soo raacney Hotelkiina nimic, habeenkaa ilaa gelin dambana halkaan ayaan hadal ku heysaney, xusuus aan ka bogsadey inkasta oo ay dhowr jeer igu soo habsatey, hadana ma aan gaarin heer danqasho; Xilli dambe ayaan soo dhaweeyey intaan lacag siiyena ku iri.

"Caliyoow qorshaheygu waa saan kuu sheegay, waxaan ku tari lahaana waa ay kuu dambeeyaan, berri ayaan kuu iman doonaa", sidii ayaan kaga soo laabtey.

Leylo ayaan gurigeedii galabtii dambe tegey, markii la ii sheegay in ayna weli ka soo laabtan Jidana waan ka soo noqdey, Faarax iyo carrurtiisina horaan u soo marey, iyana waxaan heli karey yaan siiyey, hadda dhamaanba dadkii asaxaanta ahaa ee aan magaalada kula noolaana waan soo wada salaamey. Howshii aan u imidna waxaan ka billaabey, in aan marka hore guri wanaagsan Xamar ka dhisto, muddo ka dibna waxaan ka heley guri iib ah xaafadda Hawl wadaag, halkaasaanna waxaan galey in aan dhisto Fillo aad u wanaagsan oo casri ah. Howshaasu markii ay ii dhamaateyna waxaan billaabey in aan ganacsigii u kuur galo, taas oo aan ogaadey, in ay aad igu wanaagsan tahay. Markiiba horaan howlihii ka billaabey,

dhowr bakhaar oo waaweyn ayaan ku yeeshay (?)adda kale duwan. Saaxiibkey Calina wax-(?) u xil saarey anaa xisaabiye inuu ka noq(?) maalkaas.

Muddoo yar gudaheedna waxaan helay lacag aan la maleyn karin dhowr guri oo kale ayaan Xamar ka dhisey shaqadii ganacsigana halkii ka sii wadey. Waxaan dhex galey nolol wada xisaab ah oo aan ku illoobey, shilalkii aan kala soo kulmey nolosha.

Adduunkaba wax i dhibaan ka waayay markii ay noloshey du is bedeshey, waxaana aad uga yaabanaa in weli aana ku fikirin, guur, taas oo aan ka baqdin qabey in xusuus qallafsan aan kala kulmo.

Galab Axad ah ayaan baabuurkeygii yaraa anigoo wata soo maray jidka Shabeelle, gabar jidka Bas in ay ku sugeysey aan u maleynayay, ayaan u joojiyey, ma qaano wax igu dhacay laakin dareen hor leh, oo aan in muddo ah moogaa ayaa igu soo didey, si tartiib ah ayaan baabuurkii u soo ag dhigey oo kuna iri.

"Soo fuul hadaad horey u jeeddo", iyadoon ila hadlin ayay soo gashay, xishood ayaan iska dareemay, markaan fiirsheyna waxaan soo xasuustey.... Markaasaan farxad, naxdin farxay oo aan wax aan ku sugnahay garan waayay, in muddo ah markaan yaabkaa ku maqnaa, ayaan hadal billaabey oo aan ku iri.



"Waxaan ku doodsan hayaa in hadaad raalli ka tahay aad ii sheegto magacaaga"

"Haa...Sahra Xasan", si degen ayaan k(?) keygiina ugu sheegay, barasho yaab leh oo aan anigu qasab ku billaabey ayaan is baraney, saan Raxmo god ugu hubsadeyna waa dumar aan barto tii iigu horreysey, muddo yar markaan is barashadii halkii ka sii wadanay, ayay dadkoodii i soo bartey. Gacmo furan iyo farxadna waa leygu soo dhaweeyey waxaana muddo yar ka dib galey in aan diyaar garoobo, jaceylkaas Sahra wax dhib ah kalama kulmin, adduunka oo dhan ayaad moodey inuu ii dhib yar yahay, waxaanna si aan dhib laheyn ugu aroos galeney farxad, iyo nolol wehel leh, markii horeba waxaan wehel aheyn igama dhineyne, markaan Sahra heley ayaan dhameystirey noloshii intii ka maqneyd.

Sahra in kastoo aana dhib iyo rafaad ka soo marin sidii raxmo uma aan jecleyn, laakin wax weyn bey ka bedeshey, farxadna waa ay ii keentey intii aan guursadey. Maalin Axad ah ayaan sidii caadada ii aheyd galabnimadii si aan xisaabaad ugu sameysto dhirta dhexdeeda la ii geeyey miis yar iyo kursi ka dibna anigoo nakiinad yar xisaab iyo warqado wata ayaan tegey. Kafee la ii keeney ayaan dhowr goor kabaday hadana ku noqdey xisaabaadkeygi. . . . . . .

Indhaheyga ayaan aamini waayay shakina wuu i galey markaan arkey muuqaalkii Leyla iyo Cali oo garab socda naxdin ayaan kor uga kici waayay miiskii iyo kursigii ayaan ku kor dhacay oo aan hadana is qabtey anoo gariiraaya naxdin darteed ayaan Leyla-ka hor imid, afarta gacmood ayaan is dhaafsaney, ilmo kulul oo xusuusi gaartey awoodinna inaan joojinno ayaa naga qubaneysey; hadana waan awoodi waayay.

Muddo dheer xusuus aan ka reystey; iyo boogtii aan moodaayey iney ii bogsootey ayaa iga damqatey, markaasaan xanuunsadey markaan ogaadey in jugtii iga soo gaadhey Jaceylka iyo boogtii jeceylkuba ay iga danqatey...Ah...Ah.illeyn boog jaceyl ma bogsooto, markaan Leylo arkey ee aan Raxmo waayey ayay danqatey Boogtii, anigoo argaagaxsan oo sidii ilmo dhallan ah ilmadu iga qubaneyso ayaan kursigii dhaafey hadana ku soo laabtey, markaan fariisteyna waxaan ku hadlo garan waayay, ilaa ay Leyla iyadoo war isu heynin i guubaabisey ilmadiina sidii cunug yar iga tirtirtey, anoo ka yaaban dareenkaa kulul iyo danqashada xanuunka badan ayaa qalbigeyga ku soo dhacdey,"Illeyn Boog Jaceyl Ma Bogsooto".

D H A M A A D "S E E S"

Hayaanka maalmaha xun ayaa igu habsaday, markaasaan horey iyo gadaal mid aan u socdo garan waayey. Markaan hadal beelay ayaan halkii iigu dhowayd fariistay.

Nasiib badanaa qofkaan soo marin shiddadiisa, walaaciisa iyo waxyeelladiisa. Nasiib xumaa qofkaan dhadhaminin macaankiisa, farxaddisa iyo wanaaggiisa. ...............

Waa daawo looga bogsado cudurrada iyo walaacaba waana sun lagu dhinto; waa macaan marna waa qaraar. Waa dareen qofba si u soo mara.

Murugo iyo ciil badanaa oo noloshu qaraaraa marka aad weydo qofkii aad adduunka ugu jeclayd qasabna ay noqoto inaad ka samirto naftuna ay samir kaa diiddo. Oo aad marba soo xusuusato, markaad soo xusuusatana qalbigu ku damqado.....Aaaah....Aaaah.....Aaaah.....

"Illeen boog jacayl ma bogsooto."